Kaabe

Revision Guide



1st edition

Af-Soomaali

Form Four

HEMA
BOOKS

Kaabe

Revision Guide

Af-Soomaali

Form Four

Qorayaasha

Aqoonyahano takhasus u leh maadada oo ka tirsan Xafiiska Horumarinta Manaahiijta ee Wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska

Tifaf-tirayaasha

Aqoonyahano takhasus u leh maadada oo ka tirsan Xafiiska Horumarinta Manaahiijta ee Wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska

Naqshadeynta Buugga

HEMA Books

2020

Af-Soomaali Revision Guide

© HEMA Books

Nakhshadaynta Buugga © HEMA Books 2020

Daabacaadda 1aad 2020

ISBN: 978-1-953724-90-8

Waxa Daabacay HEMA Books

In kast oo dadaal kasta la sameeyey si la isku waafajiyo Manhajka iyo buugta muraajacadda hadana khaladaad iyo wax ka tagid ba waa laga heli karaa buuggta. Way haboon tahay inaad nala wadaagto sixitaan iyo wax ku kordhin labadaba.

Contents

CUTUBKA 1AAD: GOGOLDHIGGA SUUGAANTA 1

CUTUBKA 2AAD: SHEEKOOYIN 15

Q. KOWAAD: CAYNBA CAYN 15

LUG LAGUUGU DAR 20

HAWL IYO HOGO KALIILEED 24

Q. KOWAAD: CALAF IYO CAWOBA NEGI 30

Q. LABAAD: CALAF IYO CAWOBA NEGI 33

HABAAR WAALID IYO HANSI GABADHEED 39

CUTUBKA 3AAD: MAANSADA 44

KA WARCELI WEYDIIMAHA MAANSADA 47

CUTUBKA 4AAD: MAAHMAAHDA 94

ISBARBARDHIGGA, SHARRAXAADDA & FAHANKA MAAHMAAHDA 95

CUTUBKA 5AAD: HEES-HAWLEEDKA 101

FAHANKA GOORTA IYO UJEEDDADA HEES-HAWLEEDKA 102

CUTUBKA 6AAD: DHISME-AFEEDKA (NAXWE) IYO EREYO 144

BUUXINTA, KALA SOORIDDA IYO BEDDELKA 144

EREYO IYO ODHAAHYO SARBEEBAN 153

CUTUBKA 7AAD: AFKA MALDAHAN **(HUMMAAGYO)** 157

GARASHADA HUMMAAGYADA TIXDA 158

CUTUBKA 8AAD: KASMAAL IYO AQOON-KORODHSI 177

B) WEYDIIMO DIINI AH: 177

T) WEYDIIMO SOOYAAL AH (TAARIIKH): 178

J) WEYDIIMO DHAQAN AH: 180

WARCELINTA CUTUBKA GOGOLDHIGGA (40%) 182

WARCELINTA CUTUBKA SHEEKADA (Goobaabta 40%) 183

WARCELINTA CUTUBKA MAANSADA 184

WARCELINTA CUTUBKA MAAHMAAHDA (40%) 186

WARCELINTA CUTUBKA HEES-HAWLEEDDA (Waxa loogu heeso iyo goorta loogu heeso 40%) 187

WARCELINTA CUTUBKA DHISME-AFEED (NAXWE) (Qaybta goobaabta) 188

WARCELINTA CUTUBKA HUMMAAGYADA QAYBTA (T) 188

CUTUBKA 1AAD: GOGOLDHIGGA SUUGAANTA

B. Weydiimo fidsan

1- Si kooban u sheeg qaafiyadda ama xaraf-raaca?

2- Waa maxay sababta loo adeegsado qaafiyadda ama xaraf-raaca?

3- Ka soo saar tuducyadan kuwo qaafiyadooda ama xaraf-raacoodu jaban yahay?

b) Hadba nimaan ka fiicnaa wakhtigu ha ii faruur xidho'e

t) Saw waxaan illaawaba nin xumi ima ogeysiiyo

j) Ma sebaan ka sebaanbaa so yaqaanka dugaagiyo, haadkii aanu kasannay?

WARCELIN.

1- Xaraf-raacu waa erayo xaraf ka wada bilaabma oo ku soo noqnoqda meerisyada tixdu ka dhisan tahay.

2- Waxa loo adeegsadaa si loogu kala sooco tixda iyo tiraabta.

3- Waxa xaraf-raacoodu jaban yahay tixda (J)

T. Ereyadan shaxda ku jira mid walba meeshu uu ku habboon yahay ku buuxi.

Baarcadde	Jiifto	Maydhaxda	Haanta	Shaqallada
Heellada	Gabayga	Maanso-geed	Maanso-guri	Maanso-gole

1. ---------- waxa loo yaqaannaa in uu yahay boqorka maansada.
2. Miisaanka maansada waxa laga eegaa ama tiriyaa ----------.
3. ---------- waxa ay bah-wadaag yihiin wiglada iyo dhaantada.
4. Haddii jiiftada sagaalleyda ah hal shaqal lagu daro waxa soo baxaya heesta ---------- .
5. Marka heesta maydhaxda xagga danbe laga ga daro saddex shaqal waa heesta ----------.
6. ---------- waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah: Gole hawleed iyo gole haasaawe.
7. Buraanburku waxa uu ka tirsan yahay maansada loo yaqaan ----------.
8. Geeraarka iyo jiiftaduba waxa ay ku wada jiraan ----------.

9. Tixda miisaankeedu u badan yahay Sagaalley iyo Tobanley waa ----------
10. Heesta ---------- shaqalladeedu waa siddeed shaqal.

J. Tixahan hoos ku qoran, sheeg mid walba god-maanseedka ay tahay adiga oo u eegaya miisaanka.

F.G. Marka aad sugto tixda miisaankeeda god-maanseedka ama badda ay tahay ku qor xarriiqyada ka hooseeya.

(1)

- ❖ Xay-guduudan la moodyoow
- ❖ Xamar weeye korkiisu
- ❖ Waa xiddaayad sideedee
- ❖ Ma xariir cusub baa?
- ❖ Afku waa xolxolkaasoo
- ❖ Ilkaha loo xanafeeyuu
- ❖ Xakamaha la dhacaaye
- ❖ Ma xandaad bir tumaa?

---

(2)

- ❖ Markaan ku hungoobay baan huray
- ❖ Haankiyo wadnahaa biyaha habaya
- ❖ Hantaaqo i gaadhay baan la hurday
- ❖ Huq iyo ma filayn hayaan kedisa
- ❖ Hayeeshee hayaaydii baa badatay
- ❖ Hammiga kalgacaylku waa habaqle
- ❖ Hed iyo waa dabayl hab soo tidhi
- ❖ Hiyigii lingaxnaa ma huriyeen
- ❖ Ma halabsaday geenyadii Hudi.

---

(3)

- Taariikhda duugga ah
- Waxaan ugu hor daabacay
- Xil damiirku qaaddiyo
- Waa faral dushayda ah
- Qalinkiyo dawaaddaa
- Inaan fuliyo ii diray
- Waxaan uga dan leeyahay
- Nin qabyaalad doojoow
- Doqonniimo waa cudur
- Haddii aad dux leedahay
- Bal docdaada uun eeg.

---

(4)

- Markii shalay lagu legdamay
- Libtiyo guushaad hesheen
- Barbaartii lee'atiyo
- Lixliyo Shiine u dhinteen
- Leel-leelka u soo marten
- Ladnaan lagu waara iyo
- Liibaantiyo raaxadii
- Labaatan cashaa hadhee
- Shalaad loogtaye ha lumin

---

(5)

- Yoocada jabaysiyo hadduu, Yicib na mooddaayey
- Yamyam laga wareeriyo libaax, yuururaa helaye
- Yamaayuuqa qayliyo markaan, yuuska demin weynay
- Ma yaxyaxay ma na la yaabbanyoo, cadho ma yaayuulay
- Yamaayuug halkuu joogay iyo Yurub ma weydaarshay

---

(6)

- Giirna miis malahoo, gidir ilmihii diid, haddaan gunne la siinayn
- Gooha reen badaneey, goor xun dararaay, halbaan abid gablooleyn
- Guri bilaay, geri la moodyeey, illeen waa gob xoolaad
- Luqun gardhaaley, gucuri weyneey, karuur gulungulcootooy
- Gucun maroorrey, good qabiilooy, ninkii gawracaa ba'ay.

---

(7)

- Calooshu intay ku haysay
- Hiyigu ku baxnaaninaayey
- Horaadka intaad jaqaysay
- Dhabtaydu intay ku haysay
- Intaad huwanayd tafdayda
- Hobeeya hobey hobeeyda
- Intaan dusha kuugu heesay
- Intaan hanad kuugu yeedhay
- Hawraaraha kugu ammaanay
- Intaan hubin kuu xambaaray
- Dartaa u hoggaansanaaday
- Hadhuubada aan ku siiyay
- Habniin adigoo ku diiday
- Intaan hambo kuu daboolay
- Hammuun iyo gaajo qaatay.

---

(8)

- Tabta seermaweydada ayaa la ii sed tiriyaaye
- Sibiq ereygu iiga ma baxee, waan u sahanshaaye
- Kolkaan meel u sii saarayaan, sabarka taabtaaye
- Sohda waxaan abbaaraa kolkaan, saaka bixiyaaye
- Kolkaan saafi karayaan naxwaha, sara idhaahdaaye
- Sabool baa dilee luuqda waan, ibo salaaxaaye
- Saakana Hadraawow murtidu, saayiraad ma lahe

- Haya cala salaax iyo haddeer, ereyba waa saace
- Soddonkiinan iyo maamulkaan, suul ku godayaaye.

---

(9)

- Casiiskii Nebi Yuusuf
- Carruurtuu la dhashay
- U kaxaysay ciyaartee
- Markay ceel ku rideen
- Ciidan oomman u keenayee
- Uga saaray cajuula'aw.

---

(10)

- Belaayoon laba qad noqon
- Bakaylana socodka baran
- Waxaan beeluhu hannayn
- Ballaysin haddaan ka dhigay
- Badhidii aan kugu ciyiyey
- Haddaad Bismillaahi tidhi
- Jacaylkeennii badhaadh
- U baaq bili iyo nasiib
- Buruudkiisuna adkaa.

---

(11)

- Allaylehe Qaali
- Markaad yar qoslayso
- Dibnaha kala qaaddo
- Afkaad qalin mooddo
- Indhaa qalacdooda
- Sidii qamar nuuray
- Sunnaa lagu qayday
- Qorriinshaha jaaha

❖ Haya cala salaax iyo haddeer, e
❖ Soddonkiinan iyo maamulkaan,

---

(9)

❖ Casiiskii Nebi Yuusuf
❖ Carruurtuu la dhashay
❖ U kaxaysay ciyaartee
❖ Markay ceel ku rideen
❖ Ciidan oomman u keenayee
❖ Uga saaray cajuula'aw.

---

(10)

❖ Belaayoon laba qad noqo
❖ Bakaylana socodka barat
❖ Waxaan beeluhu hannay
❖ Ballaysin haddaan ka dh
❖ Badhidii aan kugu ciyiye
❖ Haddaad Bismillaahi tid
❖ Jacaylkeennii badhaad
❖ U baaq bili iyo nasiib
❖ Buruudkiisuna adkaa.

---

(11)

❖ Allaylehe Qaali
❖ Markaad yar qoslay
❖ Dibnaha kala qaad
❖ Afkaad qalin mood
❖ Indhaa qalacdood
❖ Sidii qamar nuura
❖ Sunnaa lagu qa
❖ Qorriinshaha ja

- Timaa sida qaydar
- Qayood la ciyaaray
- Dabaysha la qooqa
- Qulkaasi madow ah

---

(12)

- Intaan ku sugaayey een samrayey
- Saadooy adba waad la socotaa

---

(13)

- Sagal jiidan, caad jilicsan iyo, jarar hillaacaaya
- Onkod jawleh, daad soo jimray, jahada oo xiintay
- Jawjawlihii xalay sidii, jibin u guuxaayay
- Jirka da'ay, jalleysaha gu'gii, haro jidhaamowday
- Jidhimaha afkaa marahayiyo, jababka ceegaaga

---

(14)

- Markaan is qalannayno cadowgeennu wuu qoslaa
- Ee qolo wakaasi qalbigiina yaanay gelin
- Oo wataa quruxdiiye Soomaalaay qabsada

---

(15)

- Nin hawd fadhiyoo harraad dilayoo
- Biyaha laga heegayaan ahay
- Dagaal nin u haysta meel halisoo
- Hubkiisu hangool yahaan ahay

---

(16)

- Talooy marinkaaga
- Malkaynta hilaadda
- Majara bixinteeda
- Kumaa madaxooda
- Mijaha u rogaaya?
- Maraa xabagtiisa
- Maalayda harraadan
- Kumaa ku leh muudso?
- Bulshooy muruggaaga
- Madluunkiyo ciilka
- Kumaa ka masuula?

---

(17)

- Ninka boolli cunay
- Ee been Kitaab
- Baabacada dhigay
- Baallaha ku jaray
- Inuu baaban yahay
- Uu baxar ku jiro
- Waa midaan u bixin
- Waasu isu bogay.

---

(18)

- Cabdow waa isa seegteen saaxiibkaa Hadraawiye
- Sababtana adaa loo garan siduu u jeedee
- Faalladii sirta ahayd si kalaad u rogatee
- Sagal baad daruur moodday saakaba da'aayee.

---

(19)

- Allaa Diinta dhammeeyoo
- Furqaanoo dhidibkiiya
- U soo dhiibay Rasuulkoo
- Muslimku wuu ku dhaqmaaye
- Iyada gaalo ka dhoohanoo
- Laga dhaadhicin waayoo
- Rabbi baan dhadhansiinoo
- Ifkuna waa dhalanteediyo
- Meel dharaaro la jooga'e
- Dhabtu aakhiro weeyoo
- Ruuxba tii u dhigtaabaa
- Dhaxalkeeda helaa.

---

(20)

- Indhoweydba maansada
- Murtidii tusaalaha
- Miiddii tixdaydiyo
- Ka mashquulay heesaha
- Gabayadii macaanaa
- Madal faalladeedii
- Kama rogin marriinkii

---

(21)

- Boqole aan shaqaynaynin
- Isagoon bukaan jiifin
- Balwad iyo hurdo u leexday
- Gabadhiisu biil siiso

- Baahina u weel qaatay
- Bogashada calooshooda
- Barta lagu furan eegi.

---

(22)

- Allow hiil adigaa leh
- Iyo hoo aan dhammaanin
- Hodan na waa adiguune
- Makhluuqaagan harraaday
- Halis bay ku jiraanoo
- Hororkii wax cunaayiyo
- Haaddii baa qubanaysoo
- Haayad booyad u geysay
- Badhna haabka ku haynin
- Kuma hawl baxayaanoo
- Aadmi laysu halleeyiyo
- Waxba gaalo ma haysee.

---

(23)

- Min daroofle, aqal daahyo weyn, dadab la heemaaday
- Dermo iyo furaash lagu gam'iyo, daalam iyo googo'
- Aniga oo waxaan doonayaba derajaday haysta
- Iyo duni wixii na gaga lumay, dirirtii Ceeldheere
- Dab wax gubi, dayuurado kufrigu, nagu dul gawdiidshey
- Dumbuq sumuca, degalkaan ka kacay, dahab wixii yiilley
- Dakhal jabay, wixii daar burburay, ama bakhaar duugmay
- Didibtii bannaanayd wixii, dad iyo maal jiifay.

X. Ereyada isu dhigma ee shaxdan hoose ku jira kuwa isle lanbarka iyo xarafka isu hor qor.

1. Gar adkaatay, xaajada gurracan, guurti kala maagtay	B. Gaarriye iyo Carraale	1=
2. Belwada waxa bilaabay	T. Buraanbur	2=
3. Jiiftadu waxa ay ka mid tahay	J. Hal dhaca	3=
4.Meeriska gabayga ah waxa ugu yar	X. Tooxdheer	4=
5. Gabadhii ugu horreysay ee kooxdii belwada ka mid noqotay	Kh. Waa saddex-dhudle ama saddex dhac	5=
6. Miisaanka maansada waxa daaha ka rogay	D. Laba xaraf-raac ama laba dhac	6=
7. Waa tixda keliya ee dumarka u gaara	R. Cabdi Deeqsi Warfaa (Cabdi-sinimoo)	7=
8. Waxyaabaha tixuhu ku kala geddisan yihiin waxa ka mid ah	S. Khadiija	8=
9. Heellada miisaankeedu waa	Sh. Tooxgaab	9=
10. Geeraarka iyo Jiiftadu waxa ay wadaagaan	Dh. Miisaanka	10=
11.Gabaygu waxa uu ka tirsan yahay	C. 14 shaqalley	11=

Kh. Ku buuxi meesha bannaan ereyga ku habboon ee ka maqan

1. ---------- waa iidaanka iyo koosaarka afku leeyahay.
2. Aragtida Gaarriye ee miisaanka maansada shaqalka kala badha shaqallada jiiftada sagaalleyda ah waxa la yidhaa ----------.
3. Erey-bixinta Carraale u adeegsaday miisaanka maansada waxaa ka mid ah: ---------- .
4. Gaarriye miisaanka maansada waxa uu soo bandhigay sannadkii ----------.
5. Heesta belwadu waxa ay ka soo jeedaa heesta ----------.
6. ---------- waa xeerka fagaasa ee kala sooca qaybaha tixda.
7. Miisaanka maansadu waxa uu markii u horreysay ku soo baxay wargeyskii la odhan jiray ----------.
8. ---------- miisaankiisu waxa uu u badan yahay 20 shaqalle iyo 21 shaqalle.
9. Hakadka gabaygu waxa uu kala qaybiyaa ---------- iyo ----------.
10. ---------- waa astaan ka mid ah astaamaha tixda.
11. Dhirta cagaaran ama meesha doogga leh waayadii hore waxa loo yaqaannay in ay ---------- leedahay.
12. Tixda ama maansada dumarka u gaara waxa ka mid ah ----------.
13. Tixaha ama maansada Soomaalidu waxa ay ka dhisan yihiin laba midkood; ---------- iyo ----------.
14. ---------- waa ereyo xaraf ka wada bilaabma oo ku soo noqnoqda meeris ama beyd kasta oo tixda ka mid ah.
15. Kooxdii Belwada ee Cabdi-sinimoo waxa la aas-aasay sannadkii ----------.
16. Suugaanta waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah; ---------- iyo ----------.
17. Maanso geedka waxaa ka mid ah; ---------- iyo ----------.
18. ---------- waxa uu ku jiraa maansada la yidhaa: Maanso guri.
19. Astaamaha gabaygu dheeryahay tixaha ama maansada kale waxaa ka mid ah; ----------.
20. Buraanburku waxa uu leeyahay ----------.

D. KA WARCELI DHAMMAAN WEYDIIMAHAN HOOSE

1. Guud ahaan immisa ayaa loo qaybiyaa Maansada? Tax tirada adigoo midwalba gaarkiisa u sharraxaya?

2. Qeex waxa uu Gabaygu ku noqday boqorka Maansada?

3. Buraanburku maansada qaybtee ayaa uu ka tirsan yahay? Sababee warcelintaada?

4. Qor shan maanso oo ka tirsan maansada Soomaalida oo isku bah ah? Sheeg qodobbada ay ku midoobeen?

5. Maansada loo yaqaan Masafada sheeg tix ay isku bahyihiin iyo sababta?

6. Maansada ama Tixda Soomaalida tee ayaa ugu caansan? Maxayse ku mutaysatay caannimadaas?

7. Jiiftadu goorma ayaa ay ku soo shaacbaxday Maansada Soomaalida?

8. Immisa tixood ayaa noqonaya guud ahaan Maanso-geed?

9. Immisa ayaa loo qaybiyaa Maanso-gole?

10. Hees-hawleeddu qaybtee ayaa ay ka tirsan tahay Maansada? Maxay ku noqotay qaybta aad ku tirisay?

11. Afar qodob oo Buraanburku ku noqday Maanso-guri sheeg?

12. Curin ahaan Maansada aad maleynayso in ay ugu adagtahay sheeg oo caddee sababta?

13. Maansada inta badan xarafraaceeda la baalmaro waa tee?

_____

_____

_____

_____

14. Maansada loo yaqaan Guurow qaybtee ayaa ay ka tirsan tahay Maansada?

_____

_____

_____

_____

15. Maansada hadhaceeda ugu badani immisa dhac ayaa uu gaadhaa? Waa na maansadee?

_____

_____

_____

_____

R. KU BUUXI MEESHA MADHAN WAXA KA MAQAN

1. Astaamaha Maansada waxa ka mid ah Xarafraaca iyo _____
2. Maansada habdhaceedu haldhaca yahay waxa ka mid ah Geeraarka iyo _____
3. _____waxa uu ka tirsan yahay Maanso-geed
4. _____waxa tirintiisu gaar u tahay haweenka
5. Masafada habdhaceedu waxa weeyi _____dhac
6. _____waxa ay tirsan tahay Suugaanta qaybta la yidhaa Tiraabta
7. _____waa mid ka mid ah habdhismeedka Maansada
8. Guud ahaan waxa Suugaanta loo qaybiyaa _____&_____
9. Waxyaabaha Suugaanta lagu qeexi jiray waayadii hore waxa ka mid ahaa _____
10. Tixda ama Maansada waxa laga miisaamaa dhinaca _____

CUTUBKA 2AAD: SHEEKOOYIN

Q. KOWAAD: CAYNBA CAYN

Akhri sheekadan hoose oo goobaab warcelinta ka hoosaysa ta u habboon.

Qaali inta ay afaafka istaagtay ayaa ay si culus oo murugo leh isha u marisay aqalka uurkiisii. Daymadeedii waxa ay ku dul hakatay dhadhaarro iyo dab sii damaaya. Kuwaas oo aad mooddo in ay ku beerlaxawsanayaan ha naga tagin.Ninkaaga ha ka tagin.Inta ay dib u maagtay oo ay dibinta qaniintay ayaa ay tidhi: Maya.....Haa.....Ninku waa kee? Ma kii i xabaal noolleeyay ee cagta iyo ciddida iila tagay.Heshiis iyo meel ka dheer.

Inta ay hagoog isu jiq siisay, gawsahana is gelisay ayaa ay dibedda usoo baxday. Cir deddan...Habeen soo madaw iyo gudcur magan gooye ah ayaa ka hor yimid. Baqdin baa gashay,oo xaggaa iyo xaggaa midna uma ay nuuxsanin. Halkeedii ayaa ay qotansatay sanqar iyo dhaqaaqna dhegaha ayaa ay u jalqisay.Haddii ay in nabar ah hinbiriirsatay, waydayna raamsigii awrta iyo cifashii adhiga wax dhaafsiisan, ayaa ay neef weyni ka soo go'day oo uu dareenkii ka baxay.Goortii ay indhaheedii qabatimeen mugdigii ayaa ay sidii gaade tuug iyadoo shanqadh iyo qoobad iska dhawraysa, tallaabadana hoosta ka xadaysa si degdeg ah ardaagii uga soo gudubtay.

Jiitintii inta ay iska rogtay ayaa ay bannaanka u booday. Markii ay dhabarka jeedisay oo ay dhaqaaq maagtay ayaa ay wax gocatay oo ay tidhi:"Gef iyo guur aan garawshiiyo lahayn miyaa caawa gurigaygii iga saaray."

Haydaarto meeshii leh waa laga hulleelaaye, iyadoo urugo la tiicaysa oo tiiraanyo awgeed ilmo indhaheeda ku soo taagan yihiin ayaa ay cidlo afka saartay.Bal xaggee bay tagi? Mooyi oo ma ay garanayn, baxso ayuunbaa u muuqatay oo is miidaamis bay ahayd.

Beeshii ....Buulashii ...Xeryihii...Xoolihii iyo dad wixii ay taqaannay in ay dib u aragto maa ay rabin, weligeed iyo waaqeed in ay il iyo baal saarto ma ay doonayn ninkeedii.Waxa ay garwaaqsatay, ninkeedii siduu u ahaan jiray markii ay is guursadeen ee iyana fara ku burur neef waylood ah ay ahayd isna uu hammuunnaa.

Ninkeeda oo laf iyo laxaad u dhashay, hawlkar dhaqaale leh ayaa uu ahaa oo Rabbi xoolo ku mannaystay, laba xaas buu lahaa iyana waa uu ku saddexeeyay.
Hasayeeshee, kulayl bur-laduulnimo ah ayuu ahaa, dumarka uma roonayn, oo xilegube ayaa lagu xaman jiray.

Runtu sidii ay ahaydna curadkii aabbaheed ee Warsame Waayeel waa saluugsanaa guurkooda, hasa ahaatee xeerkaa sidaa ahaa oo dumar la isku diidaa kama dhexayn Geelle iyana wax buu ka dareemay.
Xogtu waa in Qaali, Geelle, kalgacal gu'yaal jiray u haysay.Teer iyo waagii guudka loo dabayba, hoosta ayaa ay kala dhacsanayd.Dherarkiisa iyo jidhkiisa dhisan ...Dhaqaaqiisa iyo dhawaaqiisa nool ...Ragganimada dheelitiran iyo dhiirranaantiisa tilmaaman markii ay dheehataba waa lagu sii dhibcaayay.

Iyada oo xilihii noqotay oo ubad ay u dhashay dhabarka saartay ayaa ay ku dhadhabi jirtay.Waxa ay xasuusatay habeenkii isugu horaysay ee ay si dhaxalgal ah u anbaqaaday gacalladoodu waa habeen tilmaamane. Waxa ay ahayd caddo shan iyo tobnaad irbaddii dhul ku dhacdaa aanay qarsoomayn. Ina abtideed Kordahab oo uu qabay adeerkeed ayaa isku soo saartay.

Goor cawaysin ah oo lugtii go'day ayaa ay gurigeeda oo ninkii ka maqanyahay isugu keentay. Haddii loo kala tagay labadoodii ayaa Qaali oo wadnuhu fugtaa hayo oo inta uu dhiiggii dhawr goor hanboobiray oofaha jugeeyay ay hoos u jeedsatay oo jalleecada la waabatay, hasa yeeshee,ilka caddayntii iyo qalbi furnaantii Geelle ayaa dhiirrigelisay oo qaladii iyo is ururintii ka biisay. Anigoo ku doonaya iyo adigoo i doonaya waa isla doonasho Ilaah, inta mid waliba hoosta iska yidhi ayaa haasaawihii la laba lisay oo mukur iyo murtiba la is dhaafsaday.

Hadal iyo dhammaantiis, sheekadoodu waa hufnayd, haasaawuhuna waa habaysnaa oo i jiid aan ku jiido iyo jikaar laguma caddaanine waa la is jaawis garanayay. Guur baan u jeedaa gayaankaana waan ahay geddaheedna waad joogtaa iyo ha la yeelo. Reerkayaga i weydiiso ayaa hadalkii lagu gundhabay.

Waxa xigay geed fadhiisi iyo gabbaati bixin. Konton halaad oo goojinaya oo toban ugub tahay, shan iyo tobanna curad tahay oo baarqabkii ina Muunays dheeryahay.

Faras nugaaleed ashkir ah iyo qori Maadhiin ah oo aan weli la qashar tuurin.Intaas oo xeradiisa ku jiray ayuu Geelle yarad usoo tubay. Meherkeeduna waxa uu ahaa intii hooyadeed iyo labaatan iyo shan halaad.

Hasa ahaatee, Qaali oo ahayd ta boqol lagala baxo ayaan la sheegin labood dhaafay oo aan dib usoo jalleecin ahaydna tii loogu heesay:

Hobey Sayn ciyaartiyo waa
Tintu sayn ciyaartiyo waa
Cillaan madoowoo
Wajigeedu cunugtan
Casaan dhiiran weeyaan

Hobey Curubtii macaanayd
Dibnaheedu waa culay
Cuddoon weeyi naasuhu
Caaradu ay garan tahay

Hobey Ma ogtahay kub iyo cudud
Calaacalo kollay tahay
Curdin weeyi uguboo
Dhididkeedu waa cadar

Hobey Caadilkii abuuraa
Qurux ugu cadgooyoo
Cayntiyo hablaha kale
Ciddideed ma gaadhaan.

Waa tii Qaali u caleemo saarnayd ilwaadsamida, waa tii loo quudhi waayay Geellahan odayga ah ee labada xaas leh.

Barbaartii gayaanka ahayd ee ay intooda badan ku gacan saydhayna, isha intii ay ku gubeen ayaa ay ku gurxameen.Hayaay, qurux khasaartay dheh.Kuwii ay ooddoodu kala rognayd waxay ku xanshashaqeen in la sixray.Waa wada yaab oo la yidhi, tolow maxay ku aragtay?

1. Haldoorka sheekadani waa:
   b. Qaali
   t. Qumman
   j. Qawdhan
   x. Qaafa

2. Gabadha sheekadani ka warramaysaa waxay ahayd:
   b. Minyaro
   t. Minweyno
   j. Magmagato
   x. Midna

3. Qaali markii la guursaday ninkeedu wuu
   b. u roonaa
   t. u darnaa
   j. u necbaa
   x. Dhammaan

4. Habeenkii u horreeyay ee ay kulmaan Geelle iyo Qaali waxay ahayd:
   b. Casar
   t. Duhur
   j. Aroor
   x. Caweys

5. Geelle iyo Qaali waxa isu keentay:
   b. Kordahab
   t. Kaaha
   j. Cosob
   x. Bilan

6. Qaali waxa laga bixiyay:
   b. Shan iyo labaatan halaad, baarqab,faras iyo qori
   t. Shan iyo toban halaad, baarqab, faras iyo qori
   j. Konton halaad, baarqab, faras, iyo qori
   x. Boqol halaad, baarqab, faras iyo qori

7. Qaali markii ay Geelle isu keliyaysteen way foorarsatay:
   b. Xishood ugubnimo darteed
   t. Xishood dumarnimo darteed
   j. Xishood jacayl darteed
   x. Dhammaan

8. Geelle waxa uu ahaa nin:
   b. Xoolo yar
   t. Xoolo badan
   j. Danyar
   x. Midna

9. Warsame-Waayeel waxa uu ahaa:
   b. Geelle walaalkii
   t. Qaali walaalkeed
   j. Qaali aabbaheed
   x. Geelle aabbihii

10. Barbaartii deegaanku guurkii Qaali way:
   b. Ku farxeen
   t. Ka naxeen
   j. Jeclaysteen
   x. Midna

11. Tuducyada heesta ah ee sheekada ku jiraa waxay ka turjumayaan:
   b. Quruxdii Qaali
   t. Geesinnimadii Geelle
   j. Ammaantii Warsame
   x. Dhammaan

12. Fara-ku-burur neef wayloodle ah waxa looga jeedaa:
   b. Dhaylo dhallinyarnimo
   t. Dheeri gashaantinimo
   j. Dhuubni weydnimo
   x. Dhammaan

13. Geelle waxa loogu quudhi waayay Qaali:
    b. Da' weynaan
    t. Duunyo yaraan
    j. Dumar badnaan
    x. Doqoniimo
14. Dumarku waxay u neceb yihiin ragga:
    b. Geeljiraha
    t. Ganacsadaha
    j. Geesiga
    x. Godadlaha

15. Jiitinta ay iska rogtay ee sheekada ku jirtaa waa:
    b. Oodroggo
    t. Yacay
    j. Kayn
    x. Mus

LUG LAGUUGU DAR

Akhri sheekadan hoose oo goobaab warcelinta ka hoosaysa ta u habboon.

Geyigu waa geyi colaadeed oo dhaca xoolaha iyo dilkuna waa joogto. Ninkii caano la'aan iyo caydhnimo ka baqaayay waxa uu u tafo-xaytay geel uu xoog ku soo taabo. Kii dakano laga qabayna kii ka hayay ayaa uu ka doontay, birtana u tuntay.

Soomaalida ka sokow, waxa mar walba laga dareen qabay gaalo madow oo iyaga iyo raacatadu ay col ahaayeen. Nin ka mid ahaa madax-dhaqameedyadii berigaas ayaa soo rogay xeerar cusub oo aanay Soomaalidu hore u aqoonin. Waxa uu guddoomiyay in la ururiyo niman soo-jeedayaal loo bixiyay oo hawshoodu tahay in ay degmada duleedkeeda habeenkii gaaf wareegaan, oo raad col oo soohdintooda soo galay ilaaleeyaan. Haddii ay wax arkaan ama dareemaanna ka soo warbixiyaan. Waxa iyana la guddoomiyay reerkii ay nimankaasi u tagaan ba in uu siiyo neef ay qashaan oo muddo ku naaloodaan. Raggaas ayaa ninkii madax-dhaqameedka ahaa

lagu daray, iyada oo aan la odhan "Cid baa madax ah iyo cid baa mijo ah" oo la wada sinnaa. Hasa yeeshee, ninkaas oo kale kama ay suuroobi jirin ragba in uu garabkiisa ka dayo ama uu la masoobo. Dabadeed, maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu malaha is yidhi: "Nimanka kula socda maxaa aad ku jirrabtaa, si ay u caddaato in aad tahay laboodka keliya ee aan cid labayn karin." Wuu fikiray. Haa, alleylahe hadda ayaa uu helay. Waxa uu soo jeediyay kolka xoolo la qasho ee hilba qaybsiga loo soo fadhiisto in uu isagu yeesho labada cad ee neefka ugu wanaagsan, inta kalena uu ka saami qaato.

Isla markiiba wada dareeme wax-qaybsi ay ku dulman yihiin in uu guddoonkaasi xambaarsan yahay. Cidi se waa ay ku dhaci weyday in ay dood ka celiso. Hawraarsan iyo guddoon ayaa dharaartaasi lagu kala dareeray. Muddo haddii ay sidaasi ku socotay ayaa raggii adkaysan waayay. Markaas ayaa inta ay shireen talo ku goosteen, " Waar labadan cad ee neef walba ugu wanaagsan ma wada heli karo, dhaxalna uma helin ee aynnu mid ka reebno." Taladaas ayaa lagu heshiiyey. Hasa yeeshee waxa la isu afgaran waayey oo cid dhabarka u ridatana la waayey ninkii isaga u sheegi lahaa in labadii cad mid laga reebay. Wax foodda la isula jiro oo dhul-xariiq lagu foognaadaba, ugu danbayntii ayaa ay guddoonsadeen in ay iska soo dhex saaraan saddex nin oo go'aankooda si wadajira u maqashiiya.

Ballan waxa laga dhigtay in lagu yidhaahdo: "Labada cad is kuma heshid" hasa yeeshee aan nin keli ahi arrintaasi odhan ee weedha dhihideeda la qaybsado. Waxa lagu heshiiyey ninka koowaad in uu yidhaahdo: "Wiilwaal" ka labaadna uu yidhaahdo: "Labada cad" ka saddexaadna: "Is kuma heshid."

Fiidkii kolkii ay golihii ku soo dhammaadeen ayaa kii hore yidhi: "Wiilwaal" oo degdeg u fadhiistay. Markaasaa kii labaadna halhaleel u yidhi: "labada cad" oo isna iska aammusay. Kii saddexaad kolkii uu u diyaar garoobay weedhii la isu ogaa inta ka dhiman in uu ku daro ayaa waxa daymo kulul ku eegay Wiilwaal oo markaa warankiisii si wacan gacanta midig uga buuxsaday. Daymadii qalafsanayd iyo ummalkii foolkiisa ka muuqday ayaa cabsi ba'an ku riday. Labada bawdo ayaa qallafay, garaacii wadnihiisana waxa maqlay kuwii garabkiisa fadhiyey. Nin kasta oo goobta joogay waxa ka dhaadhacday goorta uu afka ciidda gashan doonaa in ay isha baalkeeda tahay. Halkii laga filayey hadalkii hore ee ahaa, "labada cad" in uu ku dhammaystiro "isu ma heshid" ayaa uu argagaxii badnaa ka yeedhsiiyey, wax aan uurku doonayn, afkuse ka xaday. Waxa uu yidhi: "Lug la guu gu dar." Ma war baa

yaal? Xan mooyee saw in loo badheedhaa ma dhiman? Maalintaas kaddib, sow labadiisii cad iyo wixii uu doono oo uu ku darsadaaba uma garaabin? Sheeko iyo maahmaah lagu maadsado sow ma ay noqon.

1. Geyigu waxa uu ahaa geyi colaadeed waayo,
   b. Dhaca ayaa joogto ahaa
   t. Dilka ayaa joogto ahaa
   j. Dhaca iyo dilka ayaa joogto ahaa
   x. Dhaca iyo dhacsiga ayaa joogto ahaa

2. Ninkii caano la'aan iyo caydhnimo ka baqaayey waxa uu u tafo-xaytay,
   b. Geel uu yarad ku soo taabo
   t. Geel uu xoog ku soo taabo
   j. Geel uu soo ceshado
   x. Geel uu tabcado

3. Kii dakane laga qabay kii ka hayey ayaa uu u
   b. Daayey
   t. Diray
   j. Doontay
   x. Dafiray

4. Ninkaas oo kale kama suuroobi jirin in uu rag,
   b. La hadlo
   t. La shiro
   j. Is barbardhigo
   x. La heshiiyo

5. Madax-dhaqameedkii mid ka mid ahi waxa uu guddoomiyey,
   b. Niman sii jeedayaal loo bixiyey
   t. Niman soo jeedayaal loo bixiyey
   j. Niman siima joogayaal loo bixiyey
   x. Dhammaan

6. Hawraarsan iyo guddoon ayaa dharaartaas,
   b. Lagu heshiin waayey
   t. Lagu kala dareeray
   j. Lagu kala baxay
   x. Lagu ballamay

7. Daymadii qallafsanayd iyo ummalkii foolka Wiilwaal ka muuqday waxa uu ku riday,
   b. Cabsi ba'an
   t. Farxad joogto ah
   j. Ciyaar
   x. Ciil

8. Ballan waxa laga dhigtay in Wiilwaal lagu yidhaahdo:
   b. Labada cad isu hel
   t. Labada cad isu ma heshid
   j. Labada cad iska daa
   x. Labada cad qaado

9. Garaacii wadnihiisa ayaa waxa maqlaayey,
   b. Kuwii garabkiisa ka fogaa
   t. Kuwii garabkiisa fadhiyey
   j. Kuwii faciisa ahaa
   x. Kuwii fooraray

10. Nin kasta oo goobta joogay waxa ka dhaadhacday:
    b. Goorta uu ilkaha jabin doonaa in ay isha baalkeeda tahay
    t. Goorta uu afka kala qaadi doonaa in ay isha baalkeeda tahay
    j. Goorta uu afka ciidda gashan doonaa in ay isha baalkeeda tahay
    x. Goorta uu afka qaban doonaa in ay isha baalkeeda tahay

11. Waxa lagu heshiiyey ninka saddexaad in uu yidhaahdo:
    b. Wiilwaal
    t. Labada cad
    j. Isu ma heshid
    x. Labada cad isu ma heshid

12. Waxa uu argagixii badnaa ka yeedhsiiyey wax aanu afku doonayn uurku se ka xaday:
    b. Laf iyo lud laguugu dar
    t. Leg iyo lug laguugu dar
    j. Lug iyo jeeni laguugu dar
    x. Lug laguugu dar
13. " Wax aan uurku doonayn afku se ka xaday" waxa looga jeedaa:
    b. Hadal si lama filaan ah uga soo baxay
    t. Hadal aannu ka fiirsan
    j. Hadal aan la hubsan
    x. Hadal aan la jeclaysan
14. Fiidkii kolkii ay golihii ku soo dhammaadeen ayaa kii u horreeyey yidhi:
    b. Wiilwaal
    t. Labada cad
    j. Isu ma heshid
    x. Labada cad isu ma heshid
15. Wax foodda la isu la jiro ugu danbayntii waxay guddoonsadeen:
    b. In ay saddex nin iska soo dhex saaraan
    t. In ay laba nin iska soo dhex saaraan
    j. In aanay saddex nin iska soo saarin
    x. B iyo J

HAWL IYO HOGO KALIILEED

Akhri sheekadan hoose oo goobaab warcelinta ka hoosaysa ta u habboon.

Waxaa lagu jiray diraac maxarshoon ahayd, markii uu Naalleeye oo xiddigiye weyn ahaa habeenkii dambe malluugaha jeediyey. Waxa uu arkay saadaashii oo aad u fiican yididiilana ka muuqato markii cirka oo afkurubadleynaya dayaxii oo kalgalay, laxihii iyo lo'dii oo goor hore dhacay iyo waaq habaarkii oo janjeedhasaday.Waxa kale oo maskaxda ku hayey dhirta qaarkeed oo xilli magooshay.Xoolaha oo waqtigaas ishin iyo adhibasid gooyay ayaa Naalleeye werwer weyn ku hayay, hase ahaatee,habeenkaas bay yididiiloweyni kashiisa gashay, maxaa yeelay,xilli gu'iyo ifafaalihiisa baa u muuqday.Geelu maalintaas waa cokanaa adhigase kalkiisii bay ahayd.

Hiirtii waaberi markii uu ooggu istaagay buu adhigii afsaarka ka tuuray oo inta uu xayeeshidii xerada ku reebay, wixii xoogga lahaa marada u riday. Habeenkii guul ooman buu galay, subaxii dambe markii nin iyo geed la kala gartay ayaa uu oodda ka rogay oo inantii ku yidhi, "Aabbe, waan sii ceelalyo tegayaaye,adhiga soo kaxee oo geedkii qudhaca ahaa ee weynaa ku soo hagaaji."

Tallaabada wax uu hoostaka xadaba ceelkii maax geliyey buu isku tuuray. Markiiba weelka ayuudarka ku teediyay,waadaantiina moolkuu ku shalwiyey.Kolkii uu yeelkii oo dhan buuxiyay ayaa inta uu waadaantii ceelka ku riday dawliska caaraddiisii dambana xakabka ku xidhay tuur yar oo halkan ahaa isku taagay oo yidhi: "Cibaadooy aabbe adhiga soo hor." Barqo gaaban intaan la gaadhinayaa adhigii kamiin iyo rakaadba u dhammaatay. Hase ahaatee,nasiib darro adhigii qaarkiis baa kawkabay, wax uu baxnaaniyaba casar liiqii buu fuliyey. Habeenkaas meel dheer carraabe kuma gaynine guul cokan buu sii gebegebe fadhiisiyay. Waa lexjeclo iyo caadadeede, habeenkaas il iyo baalkeed isuma uu keenin ee jeedaaluu ahaa waagu markii uu galac yidhi,ayaa uu dhabbada cagta saaray, dharaartaas oo dhan waxa uu sii wadoba gabbal dhac markii ay ahayd buu reerkii usha la dhigay. Habeenkaas sidii uu filayey bay raxmadii afarta jihoba ka hillaacday. Inkasta oo uu daal iyo dekaan qabey haddana Naalleeye ma seexane ,habeenkaas oo dhana hilaadis iyo oddoros buu u soo jeeday.Geela oo deegaan raaca lagu yaqaan baa isaguna markii uu hillaacii arkay in uu oodda jebiyo u kaankaansaday. Waaberigii markii indhaha la kala gooyey,buu Naalleeye inta uu laba halaad oodhaqayo ahaa sii finnaaqsaday, sahan-tag weysada u buuxsaday. Meesha reerku yiil iyo halka uu roobku ku soo siman waxaa u dhexeysay suun abaar ahaydoo aanay xoolo geed sare iyo mid hoose toona saxar ka goyneyn.

Waxa uu sii fool jeedaba, waxa uu hanfi kaliileed iyo halas abaareed sii jiidhoba, gelinkii dambe ayaa uu dhul uu mahiigaan ku yuurursaday ooay xareeddu gal iyo geliglinba buuxisay usoo dhigtay.

Naalleeye inkasta oo harraad ka hadhay, baahibay beerka iyo boggu iskula dhegeen.Gabalku waxa uu ugu dumay gegi cidla ah iyo gudcur roobabow oo aan waxba la arkeyn. Waxa uu iska masanuun socdaba oog meel dheer ka baxaysay baa markii danbe u bidhaantay, intay neef ka soo kudday ayaa uu tallaabo kaytawba

ku dhaqaaqay oo oogtii ku tibbaday. Waxa uu soo qardo jeexaba markii uu meeshii oogtu ka baxaysay ku dhawaaday ayaa uu koor dhawaaqeed iyo jabaq kale maqlay.

Cabbaar haddii uu soo sanqadh dhagaystayna,waxa uu ku soo baxay gole ay koox dhallinyaro ahayd Waalo ku ciyaaraysey ama ku caweynaysay."waar nabad ma la sheegay?" bariido ayaa uu golihii u dedejiyey. "Waar nabade adigu maxaad sheegtay."

Intaa markii la is weydaarsaday ayaa uu nin ragga ugu da'weynaa inamadii la hadlay oo yidhi; "Waar diif iyo diihaal baa ninka ka muuqda ee kaca oo geela soo godla, ninka caano haloo soo lisee." Qacdiiba laba isku sidkanaa baa la iska daba godlay oo gaawe laba nin deeq ahaa laga soo milaalay.Aroortii dambe, markii geelii looga sii caana lisay, ayaa uu inta guri degmosan ah sii qormaystay xaggii reerkiisa ku toosay.Waxa uu maalintaa oodhan kabti iyo kaynaan ahaadoba, makhribkii buu xoolaha la xero galay.

Habeenkaas gataatidhac buu ahaa, oo dhinacii uu u jiifsaday marna iskama rogin, waagu markii uu beryey ayaa raggii beesha uu u talin jirey oo dhammi gurigiisii Naalleeye mid mid ugu soo kallaheen si ay u wareystaan."Waaye waa sidaa iyo sidii xumayd la'aw"markii la isu celceliyey ayaa "waa inoo caawa iyo geeddi" lagu guddoonsadaday. Xiddigta waaberi markii ay big soo tidhi baa khayr raro iyo ka rayso reerihii lagu dareeriyey, meesi kastaba hees ugaar ah baa loogu haloosiyey.

Waxaa maalintii oo dhan maalin sawaal la ahaadoba casar dheer baa gurigii uu Naalleeye sii laan saaray, reerkii lagu furay. Isla markiiba hawshii degistaa qof waliba meeshii uu kaga habboonaa uga feytay.Haweenkii aqaladii bay mid kastaaba qormadii loo qeydey ka dhiseen. Naalleeye iyo wiilkiisii Cartanna inta ay gudumihii, hangooladii iyo garab qaadadii la boodeen bay yagleel u dhaqaaqeen. Dhawr casho ka dib ba xoolihii barqo dhereg bay ahaayeen. Caanuhuna dhiil iyo dheriba waa ay ku baryeen.

1. Xilliga lagu jiray waxa uu ahaa:
    b. Dirir
    t. Dayr
    j. Diraac
    x. Dambarsame

2. Adhigu marka uu biyaha aad u cabbo ee uu ku bukoodo waxa loo yaqaan:
   b. Waa uu ganac go'ay
   t. Waa uu caadooday
   j. Waa uu kaalufay
   x. Waa uu kawkabay

3. Biyaha dhexdooda waxa loo yaqaan:
   b. Mool
   t. Mood
   j. Maax
   x. Miid

4. Xayeeshidu waxa weeyaan:
   b. Xoolaha waaweyn
   t. Xoolaha la iibsado
   j. Xoolaha irmaan
   x. Xoolaha itaalka daran

5. Ereyga saadaalin waxa kale oo la mid ah:
   b. Faallo
   t. Faaqidaad
   j. Oddoros
   x. Bilkeedin

6. Ciyaaraha fadhiga lagu ciyaaro waxa ka mid ah:
   b. Walasiqo
   t. Wareegto
   j. Wilwile
   x. Waalo

7. Ishinka waxaa ka mid ah:
   b. Adhiga
   t. Ugaadha
   j. Idaha
   x. Geela

8. Maalintaasi waxa ay ahayd:
   b. Kalkii geela
   t. Kalkii adhiga
   j. Kalkii lo'da
   x. Intaba
9. Naalleeye gurigii waxa uu sii laansaaray:
   b. Barqo dheer
   t. Casar dheer
   j. Goor dheer
   x. Midna
10. Naalleeye waxa loo godlay:
   b. Geel dhaqayo ah
   t. Sac dhalay
   j. Labo halaad oo isu sidkan
   x. Intaba

11. Waa'gu markii uu beryey gurigii Naalleeye waxa yimid:
   b. Haweenkii reeraha
   t. Geeljirihii
   j. Raggii beesha u talin jiray
   x. Midna

12. Haweenkii aqalladii waxa ay ka dhiseen:
   b. Kayntii
   t. Dooxooyinkii
   j. Bannaanadii
   x. Qormadii loo qeyday

13. Reerihii waxa la raray:
   b. Xiddigta waaberi markii ay soo baxday
   t. Cadceeddu markii ay soo baxday
   j. Mirtii dhexe
   x. Markii ooggu is taagay

14. Naalleeye maalintii oo dhan waxa uu ahaa:
    b. Kallahaad iyo kabti
    t. Kabti iyo kaddaloob
    j. Kabti iyo kuftin
    x. Kabti iyo keynaan

15. Xerada cusub ee xoolaha loo oodo waxa loo yaqaan:
    b. Guricas
    t. Jabad
    j. Yagleel
    x. Tuuyo-fadhiisi

16. Qofku marka uu seexdo isaga oo daalan waxa loo yaqaan:
    b. Gataatidhac
    t. Hiirdays
    j. Qaadiro
    x. Intaba

17. Naalleeye waxa uu sii jiidhay:
    b. Habaas
    t. Hanfi kaliileed iyo halas abaareed
    j. Hadimo iyo hagardaamo
    x. Dhammaan

18. Geelu waxa uu oodda jebiyaa:
    b. Marka uu arko roobka u horreeya hillaaciisa
    t. Marka uu arko colka
    j. Marka uu arko awrka
    x. Intaba

19. "Cirka ooaf-ku-rubadleynaya" waxa looga jeedaa:
    b. Tiix yar oo aan biyo dhig ahayn
    t. Qabow iyo ceeryaan
    j. Dhedo iyo sayax
    x. Midna

20. Xooluhu marka hore iyo marka danbe ee ay biyaha cabbaan waxa loo yaqaan:

b. Hormo iyo horseed

t. Kamiin iyo rakaad

j. Darjiidh iyo darleef

x. Kawkab iyo ku yaac

Q. KOWAAD: CALAF IYO CAWOBA NEGI

Akhri sheekadan hoose oo goobaab warcelinta ka hoosaysa ta u habboon.

Dalmar waxa uu ahaa doob geeljirenimo ku barbaaray, weligiina xero adhi habeenno tirsan wax ka badan ka soo toosin. Waxa uu aad ugu xeel-dheeraa agaasinka geela iyo xannaanadiisaba.

Wax uu jiilaalkii oo dhan hadba meesha caws leh geeliisa la haybiya, markii gu'gu hooray, ayaa uu hawd u carceershay. Habeenno markii uu sii dhixiyey kaddib, ayaa uu meel naq-horaad seerma-weydo ku habsaday galabtii danbe uga xero ooday.
Isla habeenkaas laftiisii ayaa mahiigaan ku yuurarsaday, subaxdiina mayay ku soo celiyay. Libdhadu markii ay soo boodday, ayaa uu geelii inta uu ka caano dhamay buuxsinka ka leexiyay. Walaalkii Ducaale oo gacanyare u ahaana waxa uu ku yidhi: "Walaal go'yaashaan soo engejinayaaye geela sii hagaaji." Cabbaar kaddib ayaa uu geelii ka daba tegay, kuna gaadhay kob caleentu heedowday geed-gaabkuna hawray isaga oo ku xasilay.

Cosobka meesha geelu daaqayay ku yiil ka sokow, roobkii xalay miray xareeddiisii baa gal iyo gelgelinba galac lahayd. Geela markii uu dhex yimidbaa isaga oo niyad-samaan iyo nayaayir la masaloolsan, dundumo dheer dhalada uga baxay, oo goonyaha jeedaalo indhaha ku qac siiyay. Inkasta oo aanu burkaba bahal ka filayn, waxa la yaab ku noqotay in uu bidhaan meel dheer ka arko. Wax uu isha la raacaba, wax ay kolba kayni ka qarisaba, bidhaantii baa soo dhowaatay, waxaanay noqotay gabadh gashaanti ah oo qurux iyo bilicba Ilaahay ku mannaystay.

Dundumadii inta uu degdeg uga degay ayaa uu xaggeedii ku dhaqaaqay si uu ilaaq iyo haasaawe in muddo ah nafta ugu soo madaddaaliyo. Waa lagu salaamay iyo waa lagaa qaaday markii ay is weydaarsadeen, cabbaarna ilaaq iyo jikaar iskala soo

horjeedeen ayaa in ay maydhax-doon tahay u sheegtay oo tidhi: "Waar xoogga aboorbaa iska leh ee kaalay geedkan laamo maydhax leh nooga soo goo."

Gabadhu waxa ay degta ku sidatay gudin, garayska xaggiisa danbana waxa ugu jiray mindi.

"Oo ma ruuxaagan hawdka cidlada ah keligeed maaxaysaa ciidan u baahan, waabad is hubtaaye." Dalmar baa inta uu waranka jifadiisa dhulka ku xardhay Dulmar ku yidhi.

"Waar hal diidaysaa geed ay ku xoqoto ma weyda'e, ma kaalmada lagu weydiistay baa aad ka doodaysaa." Dalmar baa inta uu dhoosha ka qoslay yidhi: "Hawl ka doodis iyada reeb, oo bal geedka aad sahansatay adaa garanayee innagu toosi." Waa hagaag, ee inna keen inta ay tidhi ayaa ay koonfur-galbeed u dhaqaajisay.

Dulmar waxa ay ahayd labaatan jir hilib iyo hannaan dumarnimaba loo dhammeeyay. Dhexdu waxa ay ahayd qabatin, jooggeeduna meel dhexaad dherer raacsan. Dhiico, golxo, qallaafo, wegdo iyo wax kale oo qotonkeeda wax yeela midna laguma ogayn. Kubka boqonta iyo xagalka dhexdaa isku joogay. Curcurada farowgu cammiray iyo cabbaadhyaha qoorta ku daliigan ayaa Dalmar marka uu gabadha jalleecaba qalbigiisa jiidanayay. Timaheeda ay subaxdaas sida la yaabka leh u soo gedafaysay waxa aad moodeysay faras suunaari ah sayntii. Intaaba waxa ka sii darraa miyirka iyo hab-sami socodka ay tallaabada u miisaamaysay.

1. Haldoorka sheekadan ka dhex muuqdaa waa
   b. Daahir iyo Dulmar
   t. Dalmar iyo Degan
   j. Dalmar iyo Dulmar
   x. Deeq iyo Dulmar

2. Nolosha ay sheekadani ka warramaysaa waa nolosha,
   b. Beeraleyda
   t. Kalluumaysatada
   j. Xoolo dhaqatada
   x. Magaalada

3. Alaabtii ay siddatay gabadha sheekada ku xusan waxa ka mid ahaa,
   b. Hangool iyo gudin
   t. Gudin iyo mindi
   j. Harag iyo mindi
   x. Mindi iyo ul

4. Dulmar da'deedu waxa ay ahayd,
   b. 30 jir
   t. 20 jir
   j. 25 jir
   x. 15 jir

5. Naq-horaad seerma-weydo waxa looga jeedaa,
   b. Cawska jiilaalka
   t. Doogga u horreeya ee gu'ga
   j. Dumaaga dayrta
   x. Dhammaan

6. Curcurada farowgu cammiray ee la sheegayaa waxa weeyi,
   b. Hilibka gacmuhu yeeshaan
   t. Hilibka kubku yeesho
   j. Hilibka dhabannadu yeeshaan
   x. Intaba

7. Isaga oo niyad-samaan iyo nayaayir la masaloolsan waxa looga jeedaa,
   b. Faraxsan
   t. Murugaysan
   j. Werwersan
   x. Dhoolacaddeyn

8. Waranka jifadiisa waxa dhulka lagu xardhaa marka la
   b. Dagaallamayo
   t. Haasaawayo
   j. Hanjabayo
   x. Xarragoonayo

9. "Ma ruuxaagan cidlada keligeed maaxaysaa ciidan u baahan" waxa yidhi:
   b. Diiriye
   t. Dalmar
   j. Daahir
   x. Dugsiiye
10. Gabadha sheekadan ku xusani waxa ay ahayd,
   b. Caws doon
   t. Maydhax doon
   j. Xoolo doon
   x. Midho doon
11. Joogga Dulmar waxa uu ahaa:
   b. Meel dhexaad gaabni raacsan
   t. Meel dhexaad dherer raacsan
   j. Gaabni
   x. Dherer

Q. LABAAD: CALAF IYO CAWOBA NEGI

Akhri sheekadan hoose oo goobaab warcelinta ka hoosaysa ta u habboon.

Dalmar geedkii inta uu iska lulay ayaa uu hoos u soo eegay, oo yidhi, "keen gudinta oo adaa garanayee laamaha maydhaxda fiican leh tilmaamo." Gudintii markii ay soo fidisay ayaa uu gaar u sii milicsaday. Isaga oo aad u sii miliilicay markii ay aragtay, ayaa inta ay waxoogaa sheexday, indhaha hoos u rogtay oo dhinaca kale isku barbarisay. Inta uu garaaciddii degdeg u bilaabay ayaa uu iyana il-qoodha hoos uga eegayay. Foolkeeda suubban, suniyaha gayr-gayran ee indhaha korkooda ku dalliigan, ilkana safan ee cadcad iyo cirridka sugulka ah ee saldhiggooda ku seeman, ayaa dhammaanba Dalmar si weyn u saameeyay.

Laangooyadii markii uu dhammeeyay ayaa uu geedkii ka soo degay oo inta uu gudinta qammaankeedii ku fadhiistay haasaawe bilaabay. Dulmar inta kolkiiba gudintii la soo baxday ayay bilawday maydhax diirashadii iyada oo aan haasaawihii iyo hab-maamuuskii raggana aan ka tegin.

Wax ay haasaawaha talalixiyaanba, cadceeddu markii ay dhinaca galbeed u hoogaansatay, ayaa ay kala dheelmasho iyo ciyaar gud habeenkaasa ku guddoonsadeen.

Dalmar waxa uu ku tibbaday kobtii uu geela kaga yimid. Jidka intii uu sii socday oo dhan waxa uu ku hiyi-faalloonayay quruxdii iyo heemaalkii Dulmar. Saxansaxadii jacaylka ee durba saaqday. Xasuustaa xiskiisu soo celceshanayay waxa ay halmaansiisay geedkii uu hoostiisa caanaha qotonka ah ku ogaa, meel uu ahaa waxaanu weydaartay in weyn. Mar danbe ayaa uu is garwaaqsaday isaga oo arladii caanuhu yaalleenba ka tegay. Kolkaas buu dib isku soo rogay. Hadhuubkii inta uu labada dhaban qabsaday ayaa uu cantuugo qab ka siiyay, hasayeeshee, inta aanu liqin ayay Dulmar hor timid. Cabbaar markii uu caanihii kabbo-qubleeyay ayaa illeen waa nin hawl geel ururis iyo ciyaar gud sugayaane uu fadhigii ka booday, oo geela meeshii bidhaantiisu uga muuqatay ku toosay. Fallaadhihii qorraxdu intii aanay si fiican u gadminba, geelii buu habeenkaas xerada ku soo shubay. "waar geela waa tii awalba la mayrici jiray, maxaa caawa jira oo xerada ammintan loogu aguugayaa?" Ducaale yare ayaa Dalmar weydiiyay. "waar, immika ha nala tirsane geela nirgaha ka xeree, waa ninka yar." Dalmar baa isaga uu hadalka wiilka yar diiddan sidaas yidhi.

Geelii inta uu markiiba fiid-dadbay ayaa uu barbaartii golayaasha ku caweynaysay ururssaday oo ciyaar gud u ambabaxay. Wax la sii guuro-bahalleeyaba caweysin danbe ayaa gurigii ay Dulmar tilmaantay duleedkiisa sacab iyo or laga dul qabsaday. In cabbaara markii ay haloosiyayeen, ayaa Dulmar oo hu'geedii u dhanyahay laba hablood oo kale hareeraha kaga jiraana is keentay. Wax habeenkaas oo dhan "siddida" la hayaba, waa soo dhawaadkii baa daal iyo gataati-dhac lala kala tegay. Dulmar iyadu guul iyo ammaan bay golihii kala hoyatay.

Intii ay dhallinyaradu jidka sii socdeen oo dhan faallada Dulmar ayaa lagu jiray. "Waar miyaanay wadnaba lahayn?" "Waar waa ma daasho." Alleylehe nin calfaday ayaa cawo iyo ayaanba leh. Faallooyinkaas oo dhammi waxa ay farriimo kalgacal ku ganayeen wadnihii Dalmar ee awalba Dulmar ku oognaa.

Is-araggii labaad waxa ay yeesheen, markii uu goor galab ah iyada oo adhi mayracaysa la soo joogsaday. Nabdaaddadii kaddib, waxa ay isku tuurtuureen haasaawe hufan iyo hadallo badiba ciyaartii habeenkii wacnaa la xidhiidha. Mar qudha ayaa Dalmar majarihii sheekada beddelay oo yidhi: "Naa, waa goor gaaban oo waan kala carraabeynaaye, maxay kula tahay haddii aan hadal curad ah oo weligiiba la arki jiray kuu soo jeediyo. Aan is raacsado'e haddii aad madax bannaan tahay ma kula tahay, in aynnu reer wada samaysanno." "Barashaa isugu keen laaban miyaanay adiga kula ahayn in aynnu hanaddo iyo halaajeyaal midka aynu nahay hubsanno." Dulmar oo hubsiimo iyo miyir Ilaahay u dhaliyay ayaa Dalmar u celisay.

" Waxba kama qabo'e bal aan degdegsiimana is ogaanno." Dalmar baa yidhi.

"Haddii ay degdegsiimo door dhalaan, kaadsiimana kiish lacagay dhalaan." Dulmar baa hadalkii ku soo xidhay.

Kulankii saddexaad waxa uu dhacay laba toddobaad kaddib, markii uu maalin gurigoodii soo hadh galay oo Dulmar oo caws isku-joogga oo dhammaad ku dhaw samaynaysa u yimid. Kolkii bariidadii la kala qaaday ayaa ay raartii dacal u kala bixisay oo tidhi, kolleyba socod dheer baad soo gashay ee halkan ku naso. Isaga oo gogosha ay u dhigtay quudhsanayay, ayaa inta uu qosol aan qalbiga jirin foolasha qaawiyay yidhi:

Foodsaar ma qaayibo ninkii, foolaadka ahaaye
Bal u fiirso shay kula facaa, lagu fadhiistaaye.

Inta ay kacday oo raartii laabtay, ayaa ay dermo darfoolay ah oo aan hortii dhul la dhigin usoo furfurtay oo degdeg u fidisay.

Salka markii uu dhigay ayaa iyada oo weli taagan kor u eegay oo ku yidhi:

Sacsac iyo ninkii beenlow ah baa, laga sar-goostaaye
Sarajooggu ogobeey waa si aan habboonayne
Salka dhigo naagtii xunbaa, sooggan weligeede.

Intaasi markii uu ku tuuray baa iyada oo is ururinaysa salligii dacalka kaga fadhiisatay. Haasaawe wax uu socdaba, markii ay feedha iga garo arrintu gaadhay

ayaa in uu jirabo oo garashadeeda ogaado damcay. Waxa uu ku yidhi gabadhyahay waxa aad ii sheegtaa"
Adhi sabool si loo dhaqo iyo sac gabno ah si loo lulo.

Dulmar oo garasho Ilaahay ugu deeqay sidii aan horeba u tilmaanay ayaa tidhi:
Adhi sabool si loo dhaqo soddohdaa isaga dhiib, sac gabno ah si loo lulana saddex qaar is gaadhsii.Markii uu warcelinteeda Dalmar helay in ay tahay marwadii haweenka oo mid ka rooni aanay jirin, ayaa uu guddoonsaday.

Dulmar waxa ay Dalmar u sheegtay in aabbaheed iyada oo aan weli dabka ka baydhin tacabbiray ilaa maantana maqan yahay, sidaa darteedna, aanay ma huraan hooyadeed ka mudan oo aayaheeda ka taliya lahayn. Waxase ay ka dardaar-werisay in hooyadeed guurkooda ka raalli noqon weydo. Maxaa yeelay, waxa jiray wiil walaalkeed dhalay oo laga fiicnaa, islaantase reerka u oodi jiray, sidaa awgeedna ay doonaysay in ay Dulmar ku jujuubto. Dulmar iyadu ina abtigeed raalli kama ahayn, waxaanay goosatay in ay iskeed u tashato.

Dalmar inta uu geelii sabadii ka raray oo gurigii reerkooda ku dhaweeyay ayaa uu saaxiibkii Duullane soo kaxaystay oo Dulmar dib ugu soo dabreeyay.
Galab iyada oo maqal dhex taagan bay Dalmar iyo Duullane isla soo taageen si ay iyada runta ugu dhiibaan. Wax arrintii la gorfeeyaba go'aan waxa uu noqday in marka dhagida la galo oodda jebiyaan oo aayahooda u ambabaxaan. Yabaqii reerku markii uu damay, ayaa ay aqalka isku soo daruuriyeen, hasa yeeshee habartii baa sanqadhii ku toostay oo tidhi: "Naa maxaa hugmaya?" "Hooyo iska seexo dhiillo saareen waad lahaan jirtay, cagahayga ayaa yacayga taabtaye." Inantii baa hooyadeed ku tidhi. Habartii belaayaa Ilaahay habeenkaa u tebiyay, hurdana haba yaraatee waa laga waayay.

Maalintii danbe ayaa meel guriga agtiisa ah in ay iyadu ugu timaaddo lagula ballamay. Xoolaha markii xerada lagu soo shubay ayaa ay dharkeedii isku xidhatay oo guri cusub u qaashaaratay. Wax ay habeenkii sii socdaanba, habeenkii ku laba ahaana arooskii reer Dalmar ayay rasaas damaashaad ahi ka dul dhacaysay.

1. Dalmar maalintii uu damcay in uu Dulmar la soo baxo si uu u guursado, waxa uu kaxeystay saaxiibkii:
   b. Diiriye
   t. Daahir
   j. Duullane
   x. Dayib
2. Dulmar aabbaheed iyada oo aan dabka ka baydhin ayaa uu tacabbiray waxa looga jeedaa:
   b. Tashaday
   t. Tahriibay
   j. Geeriyooday
   x. Gabadh kale guursaday
3. Dulmar hooyadeed waxa ay rabtay in ay u guuriso wiil ay:
   b. Ilma abti ahaayeen
   t. Ilma adeer ahaayeen
   j. Eeddo ay u ahayd
   x. Deris ahaayeen
4. "Adhi sabool si loo dhaqo iyo sac gabno ah si loo lulo" ugu horayn waxa ku tiraabay:
   b. Dulmar
   t. Duullane
   j. Dalmar
   x. Ducaale
5. Ujeeddada la isu jirrabi jiray waxa ay ahayd si qofka garashadiisa:
   b. Loo qiimeeyo
   t. Loo ogaado
   j. Loo hubiyo
   x. Dhammaan
6. Gogoshii hore ee Dalmar loo dhigay waa uu saluugay, waayo
   b. Waa ay yarayd
   t. Waa ay duugawday
   j. Waa ay foolxumayd
   x. Intaba

7. Kulankii saddexaad ee dhexmaray Dalmar iyo Dulmar waxa uu dhacay,
   b. Toddobaad ka dib
   t. Laba toddobaad ka dib
   j. Saddex toddobaad ka dib
   x. Afar toddobaad ka dib
8. Dulmar isku-joogga ay samaynaysay waxa uu ahaa,
   b. Mid cawska ka mid ah
   t. Mid kebadda ka mid ah
   j. Mid masafta ka mid ah
   x. Mid haanta ka mid ah
9. " Haddii ay degdegsiimo door dhalaan kaadsiimana kiish lacagay dhalaan" Waxa maahmaahdan ku tiraabay:
   b. Duullane
   t. Ducaale
   j. Dalmar
   x. Dulmar
10. "Haddii aad madax bannaan tahay" waxa looga jeedaa:
   b. Haddii aanad madaxa waxba ku xidhnayn
   t. Haddii aan wali lagu guursan
   j. Haddii aad masar xidhnayn
   x. Dhammaan
11. Faalladii dhallinyarada ee ku wajahnayd Dulmar waxa ay ku abuurtay Dalmar:
   b. Jacayl hor leh
   t. Nacayb hadal leh
   j. Kalgacal hawo ah
   x. Haasaawe joogto ah
12. Ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka ah ee la isu yimaaddo ujeeddadoodu waxa weeyi:
   b. In la isu maaweeliyo
   t. In la isu madadaaliyo
   j. In lagu haasaawo
   x. Dhammaan

13. Ciyaarta iyo sacabka Dulmar reerkooda laga dul qabsaday waxa looga jeeday:
    b. Si hablaha reerka loo soo saaro
    t. Si farriin la isu gudbiyo
    j. Si hawsha la isu dhaafiyo
    x. Dhammaan
14. "Hadal curad ah" waxa looga jeedaa:
    b. Hadal la maqli jiray
    t. Hadal cusub
    j. Hadal suuqdi ah
    x. Hadal waayeel
15. Geelii ayaa uu goor hore fiid-dadbay waxa macnaheedu yahay, marka geela:
    b. La mayricinayo
    t. La mirayo
    j. La carraabinayo
    x. Goor hore la xereeyo

HABAAR WAALID IYO HANSI GABADHEED

Akhri sheekadan hoose oo goobaab warcelinta ka hoosaysa ta u habboon.

Isaga oo laamadoodsan nabdigana kasoo jeeda ayuu maqlay or meel dheer ka baxaysa.Go'a inta uu madaxa ka feyday ayaa uu dhegaha raariciyay, waxa uuse aad wax uga maqli waayay geela raamsigiisii oo la mooddayay durbaan nin bartay si fiican u garaacayay.

Dibedda inta uu ubaxay, ayaa uu geed dugsigii kadalloobsaday oo dhawaaqii baxayay dhegta u dhigay. Cabbaar haddii uu juuq dhagaystay, ayaa sacab dhallinyaro isku aragtay si fiicana loo aloosay oo meesha ka dhacayay aqoonsaday. Markiiba inta uu sidii baarqab ban ka qooq ah oo hummaag geel u muuqday beerqaadmay,ayaa uu meeshii orku ka baxayay afka saaray. Caddo niidhi ah oo dayax afar iyo tobnaad bay ahayd cirkana caad ma saarnayn. Dhirta waxa aad moodaysay inay sardho horaad ku baraad beeshay.

Wax uu dhegaha sii nababa,ciyaartii oo isku dubbadhacday kii dhabqinayayna looga dhaartay ayaa uu dhinaca iska soo taagay. Waxa marayay laba wiil iyo gabadh sifiican botarka iyo laba-saarka llaahay u baray. Bile oo aad u luuq wacnaa baa

heesayay,inta kalena jiib iyo jaan bay raarta ka xejinayeen,illayn waa hoobal sacabyahan ahe,qacdii uu isa soo taagayba tiraabistii iyo tixdiiba waa la wareegay oo yidhi:

Dhallinyahay waa i tabayseen
Ma cirkaan kasoo dhacay
Ma dhulkaan ka soo baxay?

Heesta markii uu qabtay ayaa uu miidaankii isu daruuriyay oo uu hees diiran ku dhuftay. Gabadh qalabkeedii u dhanyahay ayaa kolkiiba is laba rog kusoo gashay. Wax uu kolba dhinac kaga yimaadaba, wax uu jaandheer, batar iyo shaxshaxlay hadba mid ku nasiyaba,waagii baa soo dhawaaday. Heestii buu isaga oo aan ciyaarta ka xaraarad goyn sheegayay oo yidhi:

Diriradu ha daateen
Waaguna ha daalaco
Deylo naysha ha ucido
Gabdhuhuna ha daalleen
Aniguna aan doob dhabo.

Hasa yeeshee,waagii soo dharaaroobay baa Qawdhan iyo himiladiisii kala dhex joogsaday.Nin iyo geed markii la kala gartay,ayaa ciyaartii la gabagabeeyay,dadkiina qofba geestii uu xalay ka soo guday u dhaqaaqay.Qawdhan isagu gabadhii ciyaarta u maraysay iyo midkale oo meel goonni ah taagnayd buu utagay oo yidhi: "Gabdhow waa la idin salaamay.""Waa lagaa qaaday" ayaa gabdhihii inta ay indhaha hoos u yara rogeen ugu nabdaada celiyeen. "Laba mar kulantay mar labaadna kulantaye magacyadiina ii sheega." "Magacyadeen waa islaame dadkii na dhalay Asli iyo Ardo ayay noogu wanqaleen." ayaa gabdhihii yidhaahdeen.

Intaas markii la iswaydaarsaday,ayaa uu yidhi, "Ammin xun baynu joognaaye,barasha wanaagsan iyo is arag danbe." "Haddii Eebbe ka dhigo" Asli baa tidhi. Wax yar haddii uu sii socday ayaa uu dib usoo jalleecay,mise Asli baa iyaduna ilqoodha daymo ugubnimo kaga xadaysa. Waabasha xishood ayaa degdeg wejiga loola kala laabtay.

Asli waxa ay ahayd toddoba iyo toban jir,qalanjo haween ah,oo mudh u baxday sidii laan dhebi ah.Joogeedu ma gaabnayn,dherar xad dhaaf ahna ma lahayn.Midabku

maarriin dhalaal buu ahaa,labada garabna timo gedafaysan baa kasoo gardaadsaday.Quruxdeeda,qiimigeeda iyo hannaqaadkeeda midna dhan loo dayo inniqi uma dhinayn.

Is araggii danbe ee ay saadiyeen waxa uu dhacay, markii uu Qawdhan galabtii danbe,Asli oo awr carraabinaysa cutub badhooq ahna laadlaadinaysa la kulmay. Hadal waa kii kooban ee kaalin gala'e waxa ay ku ballameen inay is guursadaan iyo guddoon.

1. Ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanku waxa ay ahaayeen:
   b. Xiise
   t. Xamaasad
   j. Xulasho
   x. Dhammaan
2. Ciyaaraha dhaqanka intooda badan waxa la ciyaaraa habeennimo, waayo
   b. Waa xarrago
   t. Xeelad baa ku jirta
   j. Xoolihii baa soo hoyday
   x. Xaawaleydaa jecel
3. Dhaqankii haasaawaha ee berigii hore waxa uu ahaa mid:
   b. Xeelad badan
   t. Xujo badan
   j. Hal-xidhaale badan
   x. Xikmad badan
4. Goobaha dhallinyaradu ku kulmaan sida sheekada ka muuqata waxaa ka mid ahaa:
   b. Xoolaha dhexdooda
   t. Suuqyada dhexdooda
   j. Dugsiyada dhexdooda
   x. Dhammaan
5. Haldoorka ama jilayaasha sheekadani waxa weeyi:
   b. Asli iyo Qaasin
   t. Qawdhan iyo Ardo
   j. Qawdhan iyo Asli
   x. Dhammaan

6. Meerisyada tixda ah ee sheekada u horreeya waxa tiriyey:
   b. Asli
   t. Ardo
   j. Qawdhan
   x. Bile
7. Midabka Asli waxa uu ahaa:
   b. Madow
   t. Caddaan
   j. Maarriin
   x. Midna
8. Ciyaaraha sheekadan ka dhex muuqda waxa ka mid ahaa:
   b. Saylici iyo Jaandheer
   t. Batar iyo Xoogweyn
   j. Batar iyo Jaandheer
   x. Wilwile iyo Batar
9. "Waagii dharaaroobay ayaa Qawdhan iyo himiladiisii kala dhex joogsaday." Waxa looga jeedaa:
   b. Ujeeddadiisii u rumeeyay
   t. Ujeeddadiisii ka hor yimid
   j. Ujeeddadiisii qurxiyay
   x. Midna
10. Heesta labaad ee tixda dhexdeeda ku sheegani waxa ay ka hadlaysaa:
   b. Xiisihii uu ciyaarta u qabay Qawdhan
   t. Caajiskii ciyaartu ku beertay Qawdhan
   j. Gabdho la'aantii ciyaarta
   x. Ciyaar xumadii goobta
11. Qawdhan hortii ciyaarta waxa hoggaaminayey:
   b. Ducaale
   t. Diiriye
   j. Bile
   x. Dhammaan

12. Asli waxa ay wada socdeen gabadh kale oo magaceeda la odhan jiray:
    b. Cosob
    t. Canbaro
    j. Ardo
    x. Cawrala'
13. Ninka ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka aqoontooda ku fogaaday waxa loo yaqaannaa:
    b. Fannaan
    t. Heesaa
    j. Qalanbaawi
    x. Orgi naagood
14. Qawdhan galabtii danbe ee uu la kulmay Asli waxa ay carraabinaysay:
    b. Adhi
    t. Awr
    j. Geel
    x. Faras
15. " Haddii Eebbe ka dhigo." Hadalkaa waxa ku tiraabay:
    b. Ardo
    t. Asli
    j. Qawdhan
    x. Bile

CUTUBKA 3AAD: MAANSADA

B. Weydiimaha tooska ah

1- Soo koob dulucda guud ee gabayga Macaaan iyo Qadhaadh.

2- Faallo ka bixi meerisyadan;

"Ninkii maalmo badan soo jiree madaxu boosaystay
Ama inuun rag maamuli yaqiin, wuu i maan garane
Nin kastoow halkii kuugu mudan ee muhato laabtaadu"

3- Falanqee waxa abwaanku uga jeedo "Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh meel ku wada yaalle"?

4- Faallo ka bixi halka ay ku wada yaallaan macaanka iyo qadhaadhku?

WARCELIN

1- Waxa gabaygu ka warramayey dabeecaddiisa oo iska soo horjeeda.

2- Ninka weyn ee waaya'aragga ah ama dadka sida loo maamulo soo barta, ayaa i garanaya waxa aan ahay ee qof walowba halkaad doonto iigu soo hagaag.

3- Waxa uu uga jeedaa qayb wanaagsan iyo qayb xunba waan leeyahay.

4- Waxa ay ku wada yaallaan geedka loo yaqaan Dacarta.

WEYDIIMO

1- Si kooban u sharrax gabayga Macallimiinta?

2- Qodobee abwaanku talada uu siiyey ardayda?

3- Falanqee dulucda guud ee gabayga Iftiinka Cilmiga?

4- Isbarbardhig labada gabay ee Macallimiinta iyo Iftiinka Cilmiga?

WARCELIN

1- Gabayga macallimiinta waxa tiriyey X. Aadan (Afqallooc), waxa uu kaga warramayaa qiimaha macallinka iyo kaalinta uu bulshada ugu jiro.

2- Ardayda waxa uu kula talinayaa in ay ku dedaalaan akhlaaqda wanaagsan si ay aqoon tayo leh u helaan.

3- Waxa uu sheegayaa sida ay aqoontu iftiin ugu tahay qofka barta.

4- Waxa ay wadaagaan labada gabayba qiimaha waxbarashada iyo bareha oo ah kii xambaarsanaa.

WEYDIIMO

1- Sharrax dulucda guud ee gabayga Riyaha?
2- Ma runbaa gabayaagu sida uu u ammaanay riyaha? Hadday tahay haa sheeg sababta?
3- Isbarbardhig gabayga Geela iyo gabayga Riyaha?
4- Qor saddex maahmaahood oo geelu leeyahay?

WARCELIN

1- Dulucda guud waxa weeyi inuu abwaanku tilmaamayo waxtarka riyuhu u leeyihin isaga iyo bulshadaba.
2- Haa, waayo waxa uu sheegay waxa laga faa'ido iyo manaafacaadkooda.
3- Geela waxa laga bixiyaa guurka hablaha iyo magta, riyahana waxa lagu sadqeeyaa qofka dhinta waxana laga la baxaa sibraar oo ah harag wax lagu shubto.
4- Geel laba jir soo wada mar
   Geel waa geel wixii gooyaana waa geel
   Geel bil qaday beri kuma dari waayo.

WEYDIIMO

1- Qor shan maahmaahood oo ku saabsan qodobbadan;
   b- Midnimada
   t- Dhibaatada colaadda
   j- Qabyaaladda
   x- Nabadda
   kh- Waanada

2- Falanqee dulucda guud ee gabayga Gabowga?
3- Qor maahmaah guud oo ku saabsan dulucda gabayga?
4- Isbarbardhig qofku marka uu gaboobo iyo marka uu dhallinyarta yahay?

WARCELIN

1- B- Gacmo wadajir bay wax ku gooyaan
   T- Colaad wiil baa ku dhintee wiil kuma dhasho
   J- Dugsi ma leh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane
   X- Nabad ayaa naas la nuugo leh
   Kh- Weyd iyo waanaba habeen baa lagu seexdaa
2- Dhibaatada gabowgu leeyahay ayaa Salaan Carrabey si qoto dheer uga hadlayaa.
3- Hadday geeri i dayso gabow baan i daynayn
4- Qofku marka uu gaboobo wax badan oo uu qabsan jiray dhallinyarnimadiisii ma qabsan karo.

WEYDIIMO

1- Qor afafka uu la bahda yahay Afsoomaaligu?
2- Soo qor guddidii Afsoomaaliga qortay?
3- Faallo ka bixi dulucda guud ee tixda Dalxiis?
4- Immisa arrimood ayaa ay taabanaysaa tixdu?

WARCELIN

1- Waxa uu la bah yahay Kushitik afafka la yidhaa.
2- Shariif Saalax Maxamed
   Yaasiin Cismaan Keenadiid
   Mustafe Sh. Xasan
   Axmed Cali Abokor
   Yuusuf Xirsi Axmed
   Muuse X. Ismaaciil Galaal
   Aw Jaamac Cumar Ciise
   Dahabo Faarax Xasan
   Cabdillaahi X. Abuukar
   Xasan SH. Muumin
   Maxamed Xasan Gahayr
   Maxamed X. Xuseen (Sheeko-xariir)
   Xuseen Sh. Axmed (Kaddare)

3- Dulucda guud ee tixda Dalxiis waa qiimaha iyo barwaaqada guud ee deegaanka iyo Harada Fiktooriya.
4- Dhinacyo badan oo ay ka mid tahay khayraadka dhulka, durdurada biyaha iyo qaybaha roobka.

Fiiro gaar ah: dhammaan weydiimaha tooska ah ee maansada buuggan waxa ka warceliyey Macallinka.
Qaybaha kale ee maansada badh ayaa macallinku ka shaqeeyey ee xagga danbe Warcelinta ka tixraac.

KA WARCELI WEYDIIMAHA MAANSADA

T. Weydiimo fidsan oo meerisyada ah.

Akhri dhammaan tixaha ama maansooyinka hoose oo ka warceli weydiimaha la xidhiidha ee ku hoos qoran intooda badan.

Mar baan ahay nin xaaraan maqdaca, marin jidiinkiiye
Marna tuug mugdiya baan ahoo, maal Rasuul bixine
Mar baan ahay maqaam awliyada, muqadinkoodiiye
Marna mudanka shaydaanka iyo maal jin baan ahaye

b) Meerisyadan gabayga ahi maxaa ay ka warramayaan, si kooban faallo uga bixi?

---

t) Waa maxay afka maldahan ee meerisyada la adeegsaday?

- Col haddii la wacaayo
- Lugi waa wantacow'e
- Walhadow guraddiisa
- Waalluu ii goglayaaye

❖ Ma naagtay wacan baa?

B. Meerisyadan geeraarka ah abwaanku faraskiisa waxa uu barbardhigayaa xaaskiisa, waa maxay xidhiidhka uu ka dhexaysiinayaa?

T. Kumaa lahaa curinta geeraarkan?

J. Sheeg lix arrimood oo fardaha waayadii hore Soomaalidu u adeegsan jireen? Maxaase lagaga maarmay wixii loo adeegsan jiray hadda?

X. Waa immisa midabbada farduhu? Sawir iyo qalin midabeedyo ku muuji midwalba?

❖ Wiido meel ay ka fooftay
❖ Haddii weerar la tooxo
❖ Wegan buu ka baxaaye

- Ma wanjaaf la ridaa?

B. Meerisyadan koobani faraska dhinacee ayaa ay ka ammaanayaan?

T. Waa maxay WEGAN?

- Sibraar caanaha Weeto
- Wabax looga dhergaayo
- Kooruhuu wesherraa iyo
- Sitaacuu walcinaayo
- Wiyilkii shalqanaa iyo
- Waafeerow nadigii iyo
- Warmahayga kan dheeriyo
- Waaxidkayga hadlaaya
- Intaasuu wadwadaayoo
- Waraarkuu ku sitaayoo

B. Sheeg lix ka mid ah agabka loo adeegsado Kooraha faraska?

T. Immisa shay in uu qaaddo ayaa uu faraska abwaankani awood u leeyahay sida ka muuqata meerisyada?

J. Waa maxay NADIGU?

_____

_____

_____

Lo'da dhogorta suusuubban lee, saciyo weysheeda
Adoogayba kama saadin jirin, subag guduudnayde
Iyaduna siyaaxee ninkii, soofsan jiray baa leh

b) Maxaa gabayaagani ku ammaanay lo'da? Dhammaystir astaamaha ku xusan?

Dhallinyaro walaanshayn haddaan, waabka soo galiyo
Weylaalistaad ii dhigtiyo, waalidiyo gaadha
Kaa waayey meel wacan inaad, wagac ka siisaaye

b) Beydadkan gabayga ah, waa ayo cidda lagula hadlayaa?

---

t) Immisa agab dhaqameed oo la goglado ayaa ku jira, maxayse kala yihiin?

Waa kuu ilays meel mugdiya, aad ku aragtaaye
Waa kuu afkaad ku hadashiyo, odhaahda liisaane
Waa ubaxa kii korinayee, aamminka ahaaye
Waa amalka noloshaa danbeed, ku istareexdaaye
Waa ilo biyo leh oo ninkii, oomay ka cabbaaye
Waa ixsaan kuu falee, aadmi kaa dhiga'e

b) Waa kuma qofka gabaygu ka warramayaa?

---

t) Tiri oo tax, astaamaha lagu sifeeyay qofka laga hadlayo?

---

1) Isbarbardhig labadan tixood ee geela iyo riyaha kala ammaanaya oo qodobee waxa ay ku kala duwan yihiin?

- ❖ Bilcan gabadha kuu iibi iyo baal-tukow farase
- ❖ Bustayaal xariiriyo furshaan baarax kuu gogolye
- ❖ Bir cagaha laguu geliyo iyo boholo kaa saarye
- ❖ Babaydhyada xagaagii markaan bari ku soo oonno
- ❖ Wax kaloo ku badiyaa ma jiro ban iyo yooxyooxe
- ❖ Baxsanaa adduunyada muxuu barako dheeraaday

- Waa seenyo dhuux xoolahaan sax u tilmaamaaye
- Iyadaa sakada loo baxshaa suqayar weeyaane
- Iyadaa sibraarkeeda dheer lagu socdaalaaye
- Iyadaa safruhu jiidayaan Saaxil tegayaaye
- Iyadaa saqiir iyo kabiir lagu sadqeeyaaye
- Mar haddii sokeeye is rabaa sado is weydiisto
- Sahlanaa amuurteedu waa subax walba u dhiibe

b)Waxa ay wadaagaan geela iyo riyuhu ee tixahan kore ka muuqda.

---

t)Waxa ay ku kala duwan yihiin geela iyo riyuhu ee tixahan kore ka muuqda.

---

1. Hanka gabayga anigoo yar baan hoobal ku ahaaye
2. Hal-abuurka maansada ninkii hayn jiraan ahaye
3. Hundo gaadhay oo waa tixdii hugunka dheerayde
4. Sidii halable aar waanigaa soo hankaabsadaye
5. Waa hibo Allee kayga waa loo henganayaaye

b) Meerisyadan gabayga ahi maxaa ay ka warramayaan?

---

t) Waa maxay sababta gabayaagu ugu binneeyo gabaygiisa meerisyada noocan oo kale ah?

Xadka qabada nimanbaa guboo, soo xantoobsada'e
Nimanbaa xeryaha deyr ka dhiga, xanankii Toomoode
Liiraha ragbaa Xamar u tegay, xeeb intuu maraye
Nimanbaa dayuurado ku xidhan, xiima samadaaye

b) Beydadkan gabayga ahi, maxay hoga-tusaalaynayaan?

---

t) Waa maxay "Liiraha" beydka saddexaad ku xusani?

---

1. Hadday garato Soomaali baan hogatusaayaaye
2. Shicibyahaw hillaabani waxaad hanatay mooyaane
3. Hindiyey ka soo dhoofayaan habaqlaheenniiye
4. Habaaskuu ka kacay Laaran baad wali hawaartaane
5. Hafrikoo dhan baan doonayaa ugu horreysaane
6. Horta yaa la sugayaa haddaan hawsha lagu toosin

b) Waa ayo cidda gabayaagu sheegayo ee wali hawaartaa?

---

t) Waa ayo dadka habaqlaha ah ee Hindiya ka soo dhoofayaa? Xaggee ayaa ay ku soo socdaan?

---

j) Waa ay LAARAN? Muxuuse ka qaban jiray halka uu ka kacay ee abwaanku sheegayo?

Hal-jireedda geel gaawahaa lagu hadiidaaye
Hafta boodadaa lagu gartaa heetiyow xamare
Habluhu quruxda iyo haybadday kala horreeyaane
Hogo joogga qaar baa fardaha heeno qaadka lehe
Cirkana heelimaadkiyo gu'goo hooray kala weyne
Anna ararta waataan hantiyey hoonka maansada'e

b) Maxay ka hadlayaa meerisydan gabayga ahi?

---

t) Sheeg magacyada dad iyo duunyaba waxa lagu liibaanay ee abwaanku sheegayo?

---

1. Hayaaydii beddela waa wixii hoos inoo ridaye
2. Annagaa ba reer hebela iyo haybta kala daysta
3. Hengeshii xumayd iyo dilkii haatan ka xishooda
4. Halyeygeenna dhaqa waydinkii haadka siin jiraye

b) Gabayaagu ayaa uu dhaliilayaa ama dhalleecaynayaa?

---

t) Waa maxay hayaayda uu beddela leeyahay abwaanku?

---

j) Waa maxay HENGESHU?

_____

_____

_____

1. Culimadu warkay sheegtay iyo waanadaa dhab ahe
2. Wacdi nooma laabnee naftaa welaftay shaydaane
3. Wajaq cudur warraaq malag haddaan wilif idhaa caawa
4. Isaguba khalqiga waa u wakiil aan waqiis nixine
5. Waji qadab leh weedh kulul hadduu xaqa i weydiiyo

B. Waa maxay warka Culimadu sheegtay ee uu meerisyadiisa ku sheegayaa?

_____

_____

_____

T. "Isagu ba khalqiga waa u wakiil aan waqiis nixine" Sharrax ka bixi meeriskan cidda uu abwaanku tilmaamayo?

J. Maxaa looga jeedaa WARRAAQ MALAG?

Horta yaa la sugayaa haddaan hawsha lagu toosin
Hinjiya oo hartiya buurta iyo hawdka kala jeexa
Haween iyo rag wada dhiirrada oo halasaha u jiidha
Habrihii gaboobay iyo carruur hiirata u dhiiba
Halkii dahable qoda waydin garan hogagga dhaadheere
Hoobaanta soo saara iyo halablihii goole
Haro buuxiyiyo Eabbahay hogosha weydiista

b) Abwaankani muxuu kaga hadlayaa meerisyadan kore?

t) Tax oo tiri waxyaabaha uu ku boorinayo dadka uu abwaanku la hadlayo?

Ri'daan badhaha jiilaal ku furay, buurta dhaladeeda
Een baarqab le'ekow orgiga ba'an ku sii daayey
Ee waxarta beyga leh dhasheen, bidix ku laadlaadshay
Een buqulka caano ah ka dhamay, sidigta oo biistay
Miyaa boojo geel lala simaa, bixiso weeyaane?

b) Sheeg oo sharrax waxa ay beydadkan gabayga ahi ka warramayaan?

---

t) Waa maxay waxa baarqabka le'eg ee gabayaagu sheegayaa?

Mitan godolka xoorbaa hadhuub, laga milaalaaye
Martidiyo ninkii soconayaa, maalintaa dhama'e
Miilada labaad baa rakaad, loogu mariyaaye
Mid mid uma fushee sida gubnay, maash u socotaaye

b) Waa maxay waxa godolka leh ee gabayaagu tilmaamayaa?

---

t) Immisa qof ayaa godolka uu sheegayo maalintaas dhama oo dheefsada?

---

1. Cabdiyow wadeeciyo adduun way ka bixi waaye
2. Walbahaarka waan kula qabaa wahanna ii dheere
3. Aniguba wax badan baan laqwiyey waali iyo qooqe
4. Fircoonkii wasiillada jannada waadiyada jeexday
5. Waarsiino abid waa jeclaa waase noloshiiye
6. Rag kalaa wareegto ugu hadhay waxaddii xoolaade
7. Wedku kama ajoon Nebiyadii innaga weynaaye

b) Meerisyadan gabayga ah kumaa tiriyey? Maxaa meerisyadu ka warramayaan?

---

t) Meeriska u danbeeya waa maxay gabayaaga duurxulkiisu?

---

j) "Fircoonkii wasiillada jannada waadiyada jeexday" maxaa abwaanku hogatusaalaynayaa meeriskan?

_____

_____

_____

1. Waslad maniya baan ahay asaan oofin wacadkiiye
2. Waanwaanta nololeed intaan sido waxoogaaga
3. Waddadii Xajkii iyo intaan waddanka gaadhaayo
4. Weysaysi baa ila gudboon wudduu' salaadeede
5. Waqtiga maan tukado geeridaa waajiboo xigiye

B. Si guud u sharrax waxa ay meerisyadani ka hadlayaan?

_____

_____

_____

T. Waa maxay wacadka aanu oofin ama fulin abwaanku ee uu sheegayaa?

_____

_____

_____

J. Waa maxay waddanka uu gaadhayo ee abwaanku meeriska saddexaad ku xusay?

_____

_____

_____

Sidiibaan u qawlaysanaa qalo la'aantiiye
Waa qaabaddii aad ogayd qaadku duhurkiiye
Sidiibaan u qayraansanahay una qammaanaaye
Sidiibaanu qaadhaanka shaah qayb wadaag nahaye
Qaan baan u halis nahay sidii quruxi yeelkeede
Qorraxdiyo kulaylaha dar uu dheehu qolofaystay
Oo saan qonbobay baan sidii qaran wadaagnaaye
Sidiibaan qalfoofkii u nahay qaro yaraantiiye
Qalbigiyo sidiibaa wejiga qiiq ka karayaaye
Qaaddiro sidiibaa indhuhu nala qalloocaane

b) Gabayaagani ayaa uu kula hadlayaa gabaygiisa?

---

t) Sheeg shan qodob oo gabaygan ku xusan oo ah dhibaatooyinka uu qaadka ama jaadku gaadhsiiyo qofka?

- Haro yahay Figtooriya
- Cirkan heego goostee
- Dul ka hoorka hebadkii
- Kugu hibitiqaayee
- Geel dooje hawriyo
- Danabkiyo hillaaciyo
- Mahiigaan habaasliyo
- Gudgudaha wax heeriyo
- Dogob huriye ku onkoday

b) Tixdii meerisyadani ku jireen kumaa curiyey? Maxayse ahayd ujeeddada loo curiyey?

---

t) Halkee ayaa ay ku taallaa harada FIKTOORIYA ee abwaanku xusayaa?

---

j) Immisa roob magacyadood ayaa meerisyadan ku xusan? Tax magacyadu kuwa ay kala yihiin?

Ilaahii Carshigiisa
Cishadii miciraajka
Sallallaahu calayhi
Wa calaa ahlu beyti
Mustafaha ku casuumayow

b) Faallo ka bixi waxa geeraarkan koobani ka hadlayo?

---

t) Waa ayo Mustafaha uu sheegayaa?

Oo dhabaqu dayrtii
Soo daacay malaboo
Sida xabag barsheed da`ay
Oo xamudhka daatiyo
Like debed usoo baxay
Dabagaalle ka hirqaday

b) Waa maxay dhabaqu goormaase la intifaacsadaa?

---

t) Waa maxay xidhiidhka abwaanku ka dhexaysiiyay likaha iyo dabagaallaha?

Sow bariidadaydii
Iyo bedashadeedii
Buundada ciyaartee
Beledweyn ku taallee
Biyo lulata guudkood
Badhtankeeda ma ahayn

b) Sharrax waxa meerisyadan heesta ahi ka hadlayaan?

---

t) Muxuu uga jeedaa abwaanku, buundada ciyaartee, Beledweyn ku taalla?

- ❖ Hawraartu waa Niil
- ❖ Hadalkuu u jeedaa
- ❖ Aday kuu hogmaanoo
- ❖ Uur kuu hungoobiyo
- ❖ Indho kuu harraadani
- ❖ Dabtuurkii haleelaba
- ❖ Ka hiraay yidhaahdaan
- ❖ Waxa la isu hiifaa
- ❖ Qaran waliba haaraan

- U haloosiyaa talo
- Waa heegan xaajadu
- Haddii lagu hantaaqoo
- Waxa lagu halmaalaa
- Anoo hoonka aalloo
- Lay habar wacdaayoo

b) Si guud u sharrax waxa ay meerisyadani ka warramayaan?

---

t) Faallo kooban ka bixi webiga NIIL ee meerisyadu muujinayaan?

---

j) Maxaa looga jeeddaa "Waa heegan xaajadu"?

Beertan xaaluf garowday
Reerkan aad ku xeraysay
Aday kuu xidhan yihiine
Ha ku laynin xasiidiyo
Aale ay xagxagtaane
Biro aad wada xooday iyo
Xadhkuun baad sidataaye
Kaalay oo ka xorrow

b) Tixdan koobani maxaa ay beerta ku dhaliishay?

---

t) Maxay kala yihiin Xasiidda iyo Aalaha tixda ku xusani?

Masallooyin tallantaaliyaan, maandhow leeyahaye
Nin majiiro keliyuun qabsaday, hay malaynina'e
Mar baan ahay muddeec camalsan, oo maagista aqoone
Marna macangag laayaana oo miiggan baan ahaye

b) Waa maxay masallooyinka tallantaaliga ah ee gabayaagu sheeganayaa?

---

t) Maxay kala yihiin Muddeec iyo Macangag?

---

1. Maansada ninkii bawsadaa wuu burburiyaaye
2. Beyd-gaabka waa caadadii inay ka baydhaaye
3. Bilaash buu u luuqaynayaa badawga dhaafaaye
4. Anna ararta goortaan bayimo waa bishoo kale'
5. Sidaa uma bilaabeen haddaan baadhin xaashida'e
6. Beri hore nin buug ka akhristay oo buuxsadaan ahaye

b.Kumaa tiriyey gabayga tuducyadani ka midyihiin?

---

t. Faallo ka bixi habka iyo hannaanka hal-abuurnimo ee abwaanka sida uu meerisyada ku sheegay?

Gumaystuhu hashuu naga dhaceen gurayay raadkeeda
Gu'yaal iyo gu'yaal badan hashii gama'a noo diiday
Goobtay istaagtaba hashaan joognay garabkeeda
Guuraa habeenimo hashaan gebi walba u jiidhay
Waxaan soo gucleeyaba hashaan rag isku soo gaadhnay
Gaashaandhiggeedii hashii galawgu eedaamay
Hashii geeddankeedii rag badan goodku ku casheeyay
Hashii labada gaal ee isbarkani gees u diriraysay

b) Waa maxay hasha gabayaagani sheegayaa?

---

t) Tixda noocan oo kale ah ee la dedo waxa laga hadlayo maxaa loo yaqaan?

---

1. Wuxuu leeyahay qaan bulad leh iyo baarqab iyo goole
2. Wuxuu leeyahay rimay baayirtoo baaxadloo shilise
3. Wuxuu leeyahay ramad buuxiyiyo baar-caseey nirige
4. Wuxuu leeyahay baabuur la raro oo biyaa sida'e
5. Baxsanaa adduunyada muxuu barako dheeraaday

b) Immisa qaybood ayaa bawaankani u qaybinayaa geela? Tax oo tiri waxa ay kala yihiin qaybahaasi?

---

t) Waa maxay baabuurka la raro ee abwaanku sheegay?

Annagoon gantaalaha dhaciyo haysan qori gaaban
Hashaan gaadda weynow libaax uga gabboon waayay
Inaan goraya cawl uga tagaa waa hal soo gudhaye

b) Maxaa looga kala jeedaa libaaxa iyo goraya-cawsha meerisyadan ku xusan?

---

1. Haddii qolo badraano ah hawadu buurahaa noqoto
2. Dar kaloo ka sii ba'an haddii belo ka duulduusho
3. Bunduq dhaciyo baaruud haddii la is bilaash toogto
4. Barbaar timacad bawdyaha hadday baw ka kala siiso
5. Baroorta iyo qaylada haddii buuqu demi waayo
6. Birmad culus haddii labada qolo buuradku is gaadho
7. Kuwii bu'ayey baasaar haddii boodhkii lagu siiyo
8. Haddii boqol halaad loogu daro baano iyo xaajo
9. Ways kala boqoolaan intay budad u goostaane
10. Dharaartaa dilkuu baajiyaa baar-madoobuhuye

b) Kumaa tiriyey meerisyadan kor ku qoran? Maxaase uu gabaygiisu ka warramayey?

---

t) Sheeg saddex qodob oo inta badan dagaallada Soomaalidu ka bilaabmi jireen?

---

j) Waa maxay waxa dilka baajiya ee abwaanku sheegayaa, sidaa ayaa se uu dilka u joojiyaa?

Caalinow, ta' iyo woow
Baltix-raac halkaan maro
Tukayaasha duulaa
Warka waysu tebiyaan
Waa aftahan qudhaanjadu
Geeluna tawaawaca
Kolka biyaha loo tubo
Ways tibaax yaqaannaa
Tigaaddaad arkaysaa
Kaftan ay taqaannay
Hoos-ka-tuur u leedahay
Taaha adhigu waa hadal

Urta waysku toydaa
Togaggiyo dabayluhu
Tookh bay la reemaan
Tinkir buu aboorkuba
Toos ugu xidhiidhaa
Daruuruhu tub gaaray
Heesaha u tiriyaan
Dhulku wuu tiraabaa
Tuska roobka dayruhu
Onkod buu ku taamaa.
Waxay hoga-tusaysaa
Afku nolosha waw tiir

b) Maxay guud ahaan ka hadlayaan beydadkan sare?

---

t) Sida tixdu muujinayso noolaha badankiisu waa is fahmaan, maxaa abwaanku tusaalaha uga jeedaa?

---

j) Kumaa tixda meerisyadani ku jireen tiriyey? Sannadkee ayaa uu tiriyey?

_____

_____

_____

Habaarkii Dallaayad iyo Xuur, halakadii Ciise
Higtii Weerar iyo Caamiriyo, erayadii Huube
Hankii Ina Galaaliyo Cabdiyo, lama hurtii Feytin

Hootada Ducaaliyo Carrabey, beri ku haareeyay
Cilmgii jacaylku halligee, Hodan u geeryooday
Imikaa higgaaduu ka tegay, laga hal qaataaye
Hannaankii Gahayriyo Salaan, himiladii Raage
Ma habrade Aflow iyo Jadeer, hoga-galkii Saahid

B) Immisa Abwaan ayaa meerisyadan sare ku xusan?

T) Sheeg midwalba magaciisa oo lammaan ama saddexan?

Kuwii bu'ayay baasaar haddii boodhkii lagu siiyo
Haddii boqol halaad loogu daro baano iyo xaajo
Ways kala boqoolaan intay budad u goostaane
Dharaartaa dilkuu baajiyaa baar madoobuhuye

b) Boqolka halaad yaa laga bixiyaa? Goormaase la bixiyaa?

---

t) Faahfaahi waxa boqolka halaad loogu daray ee abwaanku sheegay?

Iyagana Allaan i siin karoo, waan ka sugayaaye
Waa Seenyo-dhuux xoolahaan, sax u tilmaamaaye
Iyadaa sibraarkeeda dheer lagu socdaalaaye
Iyadaa safruhu jiidayaan, Saaxil tagayaaye

b) Waa maxay Seenyo-dhuux waxa uu gabayaagu uga jeedaa?

---

t) Maxaa laga helaa Seenyo-dhuux sida gabayaagu sheegay?

Hashaan gaaddo-weynow libaax uga gabboon waayey
Inaan goroyo-cawl uga tagaa waa hal soo gudhaye

b) Sharrax ka bixi labadan tuduc ee kor ku xusan?

---

t) Muxuu uga jeedaa Libaaxa iyo Goroyada?

Gaadiid la dhaansanahayo iyo giidhaygii madhaye
Ahminkii la gawrici jiray gaabay adhigiiye
Goggii subagga laga dhobi jiray haatan gorofaadye
Basaas bay timihii uga go'een gaaridii dumare (Ismaaciil Mire)

b) Qiimee abaartu sida ay u saameysay gaadiidkii, ahminkii, goggii iyo gaaridii?

Shabeelkii gabraar lagu idlee giiro layn jiraye
Oo godadkii kama soo ciyaan gabannadiisiiye
Hargihiisa nimankii gataa guuldarro u sidaye

b) Faaqid ayaan-darrada gaarka ah ee shabeelka ku habsatay?

Balli gudhay bullaaloon dhawayn boholihii caynta
Uma baahdo meeshii biyo leh bil iyo dheeraade
Bur maraa ku yaalliyo dhirtuu baarka jebiyaaye
Burco sool ah baa lagu dhaqaa bahalkan dhaadheere
Baxsanaa adduunyada muxuu barako dheeraaday

b) Maxay tuducyadani ka warramayaan?

---

t) Dhinacee ayaa abwaanku ka ammaanay meesigan xoolaad?

Qurux waa u isxal
Qiimina waa u taleexi
Quwadna waa u maroodi
Qafalna waa u Xamar-qaayib
Qorshana waaba u kaasi
Neefkii maanta la qooqana
Qoomamaa u danbayn.

b) Immisa qodob ayaa abwaankani ku ammaanayaa faraskiisa?

---

t) Sheeg magaca faraska abwaanku ammaanayo?

---

j) Waa maxay ISXAL ka abwaanku sheegayaa?

Hohdii Cali Sharmaakiyo godkuu, Halac ka liishaamay
Hillaacii Baxnaaniyo Afey, halasihii Yawle
Siduu Cige Baraar u hanjabee, kabacadda u heeray
Wax badan bay la heed-heetiyeen, hawshii berigiiye

B. Immisa Abwaan ayaa ku xusan tixdan kore?

T. Waa maxay Cige Baraar waxa uu sameeyey ee ay tixdu sheegaysaa?

Afku nolosha waw tiir
La'aantiisna tuur iyo
Tulux lagama waayeen
Tayo may lahaateen
Dhaqan lama tallaaleen
Qaran lama tusmaysteen
Nin kastaa ha tookhee
Far baa lagu tanaadaa

b) Faahfaahi kaalinta afku kaga jiro nolosha bulshada?

---

t) Immisa arrimood ayaa afka lagu ilaaliyaa, sida tixda ku xusan?

---

j) Waa maxay xidhiidhka ka dhexeeya afka iyo qarannimada?

Xigta Weehad laga soo lisiyo, Weris dhanaankeeda
Kaa waayey weel culan inaad, wax igu siisaaye
Wejigaa la maydhaa kolkay, waabberigii tahaye
Ma widhwidho jidhkaan lagu wadayn, weelka dhaashiga'e

b) Waa maxay Weehad iyo Weris waxa uu gabayaagu uga jeedaa?

---

t) Ayaa uu gabayaagu ka doonayaa weel culan in wax lagu siiyo? Waa maxay weelka culani?

Waaq iyo Tinniix iyo
Bal Tin-caaro weyddii
Soo tiri ayaamaha
Taariikhda raacdee!
Afkaygow, tabaaliyo
Maxaad taws ku nooleyd!

Maxaad belo u taagneyd!
Shisheeyuhu tab iyo xeel
Muxuu kugu tuntuunsaday
Tisqaadkaaga dhaawacay!

b) Faahfaahi waxa ay ka hadlayaan meerisyadan kor ku xusani?

---

t) Si kooban uga faalloo macnaha guud ee uu gudbinayo meeriska toddobaad?

---

j) Maxaa looga jeedda erayadan WAAQ, TINNIIX iyo TINCAARO?

Iyagaa abuuree sancada, lama ogaadeene
Ihaanada ma dooniyo waxaan, laayiq u ahayne
Haddii aad asluub yeelatoo, dhawrto amarkiisa
Asmac baraha liibaantu waa, inaad addeecdaaye

b) Kumaa tiriyay gabaygan, muxuuse kaga hadlayay?

---

1. Ardayahay cilmigu waa iftiin, aadamaha haga'e
2. Waa sida aroortiyo shamsiyo, oogta waaberiye
3. Ambadkiyo wuxuu kaa jiraa, inaad asqawdaaye
4. Marna waa awood aad filkaa, kaga adkaataaye
5. Omos iyo abaariyo adoo, bacad ku aynfaaday
6. Waa guri ugbaadloo gadaal, ku il-samaataaye
7. Aduunyadu hadday kaa baxdoo, iibku socon waayo
8. Waa ramad irmaanoo markaha, abid ku maashaaye
9. Markay dunidu wada iilatee, sebigu ooyaayo
10. Waa ilo dhaqaaloo ma gudho, adhaxda jiilaale
11. Waa aalad lagu xoogsadoo, lagu adeegtaaye
12. Marna waa asbaabaha nafluhu, ku intiqaalaane
13. Marna waa ilays oo xaqaa, lagu ogaadaaye

b) Abwaanka gabayga tiriyey waa kuma? Maxaa uu kaga hadlayaa gabaygiisa?

---

t) Immisa qodob ayaa uu gabayaagu ku tilmaamay qiimaha cilmiga ama aqoonta?

Muran iyo haddaan hadal la wadin, amase maandhaafba
Miyaa mudanka geel lala simaa, magane geeslayda?

b) Waa maxay geeslayda gabayaagu sheegayaa?

---

t) Geela derajo intee le'eg ayaa gabayaagu siiyay?

Ardayahay cilmigu waa iftiin, aadamaha haga'e
Waa sida aroortiyo shamsiyo, oogta waaberiye
Ambadkiyo wuxuu kaa jiraa, inaad asqawdaaye
Marna waa awood aad filkaa, kaga adkaataaye
Omos iyo abaariyo adoo, bacad ku aynfaaday
Waa guri ugbaadloo gadaal, ku il-samaataaye
Adduunyadu hadday kaa baxdoo, iibku socon waayo
Waa ramad irmaanoo markaha, abid ku maashaaye

b. Isbarbardhig aqoonta iyo adduunka oo sheeg shan arrimood oo ay ku kala duwan yihiin?

---

j. Maxaa looga jeedaa erayga MARKAHA ee abwaanku sheegay?

Waxba yaanu xeerkay i marin xoolana i siine
Xaashee nin libin kaa xistiyay xumihii waa yaabe
Xeerbeegti murantaa gartay xeelli hadashaaye
Xubin raggoo is waajahay hadday xayga ka caddaato
Afku wuxuu la xoogyahay magliga xawda kaa jara'e

b) Maxay ka hadlayaan meerisyadan koobani?

---

t) Waa maxay macnaha ereyga XEERBEEGTI?

Xariir ruuxaan aqoona
Haddii aad ku xushmaysoo
Xidho aad ku tidhaa
Kaana xaal qaban mayo
Xumaan kaagama jeedee
Waa xiskiisiyo kaaga
Xarakaadka adduunna
Waxa loo xigsanaayee
Galbeed geeyay xadkaana
Xaqiiqdii beeraha weeyi

b) Maxay tixdani ka warramaysaa guud ahaan?

---

t) Waa maxay xidhiidhka laga dhexeysiiyay galbeedka iyo beeraha?

---

j) Waa maxay "Xaalku"? Goormaase la bixiyaa?

Mataan waa ka qeybsada tolkii midha wadaagaaye
Magawsiin haddaan la iga siin maax la dhuranaayo
Inaan malab ragkale loo shushubi wax uga miideeyo
Oon meesha taagnahay annoon murudna leefaynin
Oon weliba mood iyo salaan ula maleegnaado
Oo maydhax aan igu xidhnayn maylimo u qaato

Saddex magac Allee xaajadaa la ima maransiiyo

b) Maxaa gabayaagani guud ahaan kaga hadlayaa meerisyadan?

---

t) Muxuu ka cabanayaa abwaanku sida meerisyada ku cad?

Wax badan baan cudcudnaynoo
Kufaartii cadcaddaydiyo
Col kaloo madmadow oo
Isku caynad yihiiniyo
Isticmaar na cunaayayoo
Carradaad nagu beertay
Cashuur baan bixinaynayoo
Cidhiidhaan ku jiraynayoo
Cunahay na hayeenoo
Cadkii wuu na dhammaadaye
Iimaankoo cawarreyn iyo
Cidaamkaa na fayow'e

b) Waa maxay colka madmadow ee abwaanku sheegayaa?

---

t) Waa maxay isticmaarka na cunayay ee gabayaagu sheegay? Sheeg saddex dhibaato oo isticmaarku bulshada ku hayay?

Sida geed caleeniyo, ubax guudka qariyeen
Oo gooni laamaha, ay midiba geesteed
Hoobaan is gaadhiyo, guntin midho ah leedahay
Oo soo gandoodoo, galka faraqa soo daray
Oo godan barwaaqiyo, durdur aan gudhayniyo
Gacan webi ku yaalloo, oon gu' iyo jiilaal
Midab guurin baa tee.

Sange geesi daaqsaday, oo uu galduur miray
Soddon bil iyo gawdeed, oo goobay farawgii
Sararta iyo gaaddada

b) Qodob qodob isu barbardhig geedka iyo farasku waxa ay wadaagaan iyo waxa ay ku kala duwan yihiin?

Ma geyoon ma gamashiyin
Ma gomadin ma gaagixin
Ma gabloolin maan gudhin
Mana gabin halkaygii.

Ma da' furin ogaalkay
Xaska dabada maan galin
Derajada ilhaamkiyo
Hiddihii dalaysnaa
Kuma dhiibin duuduub
Weli dalawadaydii
Doobigeedii may dhimin

b) Midee ujeeddooyinka labadan araarood?

In muddo ah adduunyada qolyahan, u ololaynaaya
Ee sida maroodiga arbaha, adhaxdu weynaatay
Ee dunidu sida aarka dhaca, ka amakaagayso
Aqoon iyo ismaqal bay laxaad, adag ku yeesheene

b. Waa maxay qolyaha gabayaagu sheegayaa?

---

t. Waa maxay macnaha arbaha ee meeriska labaad ku xusani?

Haddaad adigu edeb yeelataa, buugga ku ekaato
Oo macallinkaaga aqbashoo, waalid adeecdo
Adigoo Islaamaad cilmiga, ururin doontaaye
Inammiyo hablaba waxa tihiin, aarankaa kacaye
Nin abqaalay beertiisu waa, ku intifaacaaye
Ogow qalinka duulkii ummiya, ma arrad-beelaane

b. Meerisyada ayaa gabayaagu si gaara ula hadlayaa? Muxuuse kala hadlayaa?

---

t. Si gaara u faahfaahi meeriska u danbeeya?

Oo qaalmo deercadoo
Abasaxay degii hore
Degta gooja saareen

Oo koranka dabarkiyo
Laga daayay seetadu
Dulaha u mirood tegey

b) Waa maxay abasaxa abwaanku sheegayaa? Maxaa ka dhexeeya abasaxa iyo goojada?

---

t) Faahfaahi koranka iyo waxa abwaanku ka sheegayo?

Diyaaradahan heegada maree, haadda la ciyaara
Ammikaarka hawsha u sitee, huriya duullaanka
Dabaabadaha lagu haawadiyo, maynka lagu haaqmo
Hubka is wada Haydarojiinta iyo saanad wada haadh ah
Hostankiyo afdheeraha socdiyo, haafafkiyo jiibka
Ragga taarka soo halabsadee, hadiyad noo siiyay
Nin waliba wuxuu noo huruu, hooya leeyahaye
Habeen dhawba qani baynu noqon, waana la hubaaye

b) Si guud uga faalloo waxa ay meerisyadani ka warramayaan?

---

t) Sheeg tirada gaadiidka iyo hubka ee meerisyadan ku xusan?

Dusha midabka soomaali baad dugulka mooddaaye
Misna laguma diirsade qalbigu waa dirkii Karal'e

b) Falanqee dulucda macne ee meerisyadan?

Garre iyo guntane maalintay gees isugu booday

b) Maxaa uu uga jeedaa garre iyo guntane gabayaagu?

Oo geed midhcaaniyo
Hohob gaajo biisiyo
Gomoshaha macaaniyo
Dhafaruur gaboodliyo
Sabkax guri ku taalliyo
Gacayr iyo xangeeyada
Carruuruhu gurtaanoo
Lays nacay gasiiniyo
Guri hadhimo loo tago?

b) Faallo ka bixi waxa ay meerisyadani ka warramayaan?

---

t) Sheeg tirada geed dheefeedyada tixda ku jira iyo waxa ay ku kala duwan yihiin?

Xoolaha marka timid ninkaan xulayey geelayga

b) Faallo ka bixi dulucda macne ee meeriskan?

- Haddii reer is guursaday ciyoon Guulle inan siiyo
- Galladii adoogii hadduu qayb ka gudi waayo
- In la gooni dayrshaa markaa saw gar noqon mayso

- ➢ Goblantooy hadday baallinimo gooni la ahaato
- ➢ Gaaridu ma buuqdee hadday waano geli weydo
- ➢ In uu meherka gooyaa markaa saw gar noqon mayso

b) Fallanqee wiilka iyo gabadhu waxa ay ka mideysan yihiin?

Lafta dhabar lixaadkaa i debciyo laafyihii gacanta
Lubidaydu leyl xalay ma ledin laadadiyo taahe

b) Soo bandhig hal-abuurku waxa uu kaga calaacalayo labadan tuduc?

Waxa gooni daaqii habsaday gubadadii hawde

b) Sharrax waxa gooni daaqa ka irdheeyay bahdiisa? Waayo?

---

b) Is-barbardhig labadan tixood ee hoos ku qoran adigoo ku dabaqaaya nolosha?

- ✓ Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh meel ku wada yaalle
- ✓ Malaa'iigta naartiyo jannadu waa igu murantaaye

- Waxaan ahay nin aragaaga jecel aadna kuu necebe
- Waxaan ahay nin oday kaa dhigtay oon ku aaminine

Masaw aabbahay iyo intaan magan ka soo gaadhay
Rag waxaan ku maamuli aqaan ama ku maamuusi
Masa inaannu nahay oo tolnimo meerto noo tahaye
Oon weliba kaga miilcaddahay miidhse diidaniye
Masallaha ninkaan ii dhigayn midig ma saaraayo
Ninkii aniga iga maarmi kara uma muraad yeesha

b) Guud ahaan meerisyadani maxaa ay ka hadlayaan?

---

t) Ka soo saar hal meeris oo ka hadlaya sinnaanta dadka?

Abaartoo dhalatay oo
Arladii dhamacowdayoo
Lo'du ceelka dhex jiifto
Dhoor weyn baa curatoo
Dhinbiishay dhilataayoo
Igadh bay ka dhigaanoo
Gaawaa loo dhaqdhaqaayoo

b) Maxaa geeraarkan koobani ka warramayaa?

---

t) Faahfaahi saameynta ay abaartu ku leedahay guud ahaan dadka iyo duunyadaba?

---

j) Waa maxay gaawuhu? Maxaase loo adeegsadaa?

Qasdi jeeroo wada yeelatoo qawlka ku heshiiso
Qabyo weeyi Soomaalidaay qiiradaadaniye
Qof qalbi la' Qur'aan ka u akhriyay qaaf dhe ku harraadye
Kutubtaa sidii lagu qarridhay qiil la' aakhiro'e
Qayrkii ka hadhe waa ninkii qalay walaalkiiye

b) Soomaalidu sidee ayaa ay ku horumari karaan adoo eegaya fikradda abwaanka ee meerisyada sare ku xusan?

---

t) Meeriska saddexaad faallo ka bixi waxa uu ka hadlayo ama lagu la hadlayo?

Dhanka bari magaalada
Sow boqorad joogtoo
Biyo dahab la mooddoo
Bilicdii haweenkiyo
Bili loo dhammeeyoo
Timo boqonta joogoo
Baal goray la moodoo
Baarkana casaankii
Bidix midig is gaadhoo
Bulcad lagu xiddeeyoo
Badh ku seexanaysoo
Barkanaysa qaaroo
Huwanaysa baaloo

b) Faallo ka bixi waxa lagu ammaanay gabadha laga hadlayo?

---

t) Immisa qaybood ayaa gabayaagu u qaybiyay, gabadha uu ammaanayo timaheeda? Sheeg qayb walba waxa uu ku sheegay?

Hayeeshee dabkeedu ha ba'ee doqoni waa mooge
Daab gudimo weli sooma jarin wiilashaan diraye
Halka dunida lagu geeddi yahay deyiba maayaane

b) Maxay meerisyadani ka hadlayaan? Ayaase gabayaagu si gaara ugu dhaliilayaa waxtar la'aanta?

Baabacada weyn iyo cagaha badani waa xooge
Bir la duubay bawdyaha la mood burucyadiisiiye
Berkad buu abaaraha u yahay beesha oogada'e
Barbarkaad u eegtaba waa boqorka xoolaade
Bahdaan dhaqanin sida boonta waa layska buriyaaye
Beenaale weeyaan ninkii baqar ku faanaaye
Baxsanaa adduunyada muxuu barako dheeraaday

b) Meerisyadan gabayga ahi waa maxay xoolaha ay ka hadlayaan?

---

t) Immisa astaamood ayaa gabayaagu xoolaha uu sheegayo ku ammaanay? Tax astaamahaas tiraab ahaan?

---

j) Maxaa looga jeedaa baqarka?

Markaan dhoorka lahaa
Ee dhudhunkaygu adkaa
Ee dhulka hoos u turqaayay
Geelii aan dhiqi waayay
Ma eegoon dhabar beeloon
Usha dhaabanayaayoo
Kolba sii dhacayaa
Miyaa la igu dhaqaajay?

b) Muxuu geeraarkan koobani ka warramayaa?

---

t) Maxay ka turjumaysaa usha la dhaabanayaa?

---

j) Muxuu uga jeedaa, markaan dhoorka lahaa? Faahfaahin ka bixi?

Immisaan ku dhaqaayayoo
Dhulka oo saxariiray
Dhuubka soo bixi waayay
Wan weyn oo dhagaxoobay
Dhag intaan kaga siiyay
Subagaan ka dhuraayay
Dhiil weyn ku qudhqudhsiiyayoo
Dacartii kaaga dhammeeyay.

b) Waa maxay waxa la dhaqayay ee geeraarku sheegayaa? Faahfaahi sida loo dhaqayey?

---

t) Guud ahaan maxaa geeraarku ka hadlayaa?

Lama helo wadaadow waxaan, cidi ku hawshoone
Naftaa loo hantaaqaa waxaad, hiigso leedahaye
Haween iyo rag waa loo guntaday, hawshii berigiiye
Gobannimadan hoobaan-dhacdee, laga harraad beelay
Haydh-haydh hadday nagu ahayd, haw ku soo nidhiye

Haaneednay Maandeeq Ilaah, nama hungaysiine

b) Meerisyadan gabayga ah ayaa lagu la hadlayaa? Dhankeese laga la hadlayaa?

---

t) Maxay ahayd hawsha ay ragga iyo dumarku sida wadajirka ah uga qayb-qaateen?

---

j) Muxuu uga jeedaa abwaanku haaneednay Maandeeq?

- Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kii galaye
- Dusha midabka soomaali baad dugulka mooddaaye
- Misana lagu ma diirsade qalbigu waa dirkii Karal'e

➢ Baadida ninbaa kula daydayi daalna kaa badane
➢ Oon doonahayn inaad heshana daayin abidkaaye
➢ Dadkuna mooddi duul wada dhashoo wax u dahsoonayne
➢ Dallana malaha aakhiro haddii loo kitaab dayo'e

b) Isbarbardhig macne ahaan xidhiidhka ka dhexeeya tuducyadan kor ku xusan?

---

t) Qodobee waxa ay wadaagaan?

---

j) Qodobee waxa ay ku kala duwan yihiin?

- Ma tallaabadaan la qadhqadhoo tiigsi lugo moodday
- Ma tukubay sidii habar tu kale tuugmo ugu faydan

- Nin gaboobay iimow haddaan orod ku laabnayne
- Mar hadduu ulaha dheer qabsado waa dad aakhiro'e

b) Midee macnaha tuducyadan kor ku xusan?

Aboodigu ma lalo garab hadduu iin ku leeyahaye
Orod uma hollado ooglihii adhaxda beelaaye
Ma aarsado il iyo oof nin ay iini kaga taalle
Aroos uma galbado nimay wadnaha arami jiiftaaye
Ul ma qaadan karo sheybihii arag darreeyaaye

b) Meerisyadan kor ku xusani waxay ka mid yihiin gabaygii Alleyl-dumay, haddii la sharraxana waa sidan:

- Baabuurku ma duulo haddii baalka nabar kaga yaallo
- Ma ordi karto islaan adhaxda ka jabtay
- Ilmo yar oo dhashay cadowgiisa is ka ma celiyo
- Gabadh yari bud ma qaadan karto

Ma ku saxbaa sharraxa meerisyadan laga bixiyay?

Sheeg sababta?

U sharrax sida ay sax ku yihiin?

- Sanqaroor madoobow hadduu siifad ba'an yeesho
- Sakaallada iyo jeeniga hadduu dhibi ku seylaansho
- Salaqleynta orodkii hadduu socod libaax yeesho
- Suudiga dharaareed hadday saadka cuni weydo

b) Falanqee afartan tuduc ee gabayga ah adiga oo hayb-soocaya sifo kasta oo ku jirta?

Ninba wuxuu dadweynaha gashaday gumaradeed tuugye
Nafiba geedka ay beeratay goosan midhaheede

b) Sharrax waafi ah ka bixi cidhib reebka iyo cawaaqibka gabayaagu sheegaayo?

Akhri tixdan oo dhuux dulucda macne kadibna ka jawaab su'aalaha ka danbeeya.

Dam habeen madow iyo dayaxu waa is daba jooge
Diraacood abaara iyo roob waa is daba jooge
Durdur laga cabbaayo iyo oon waa is daba jooge
Diihaalka gaajo iyo dhereg waa is daba jooge
Dagaal lagu idlaadiyo heshiis waa is daba jooge
Waa doorba door oo dunidu waa is daba jooge

b) Ka soo saar tixdan waxyaabaha la baasaysto (la sharaysto) ee ku jira una tax sida ay isugu xigaan (u kala horreeyaan)?

---

t) Ka soo saar markana waxyaabo ku lid ah inta wax ee dadku sharaysto ee aad qortay oo isugu aadi sida ay hidde ahaan isu leeyihiin?

---

j) Ka bixi sharrax faahfaahsan dulucda macne ee tixda oo caddee sida ay waxyaabaha isu lidka ahi saameyn ugu leeyihiin nolosha dadka?

Nin i qadiyay nin i quudshay iyo nin i qardoofeeyay
Nin i qaatay nin i qaabshay iyo qado nin ii qaaday
Qadhaadh lagu ma waaree haddaan dib u qaboobaado
Qofba wuxuu i taray sow qayb u garan maayo
(Maxamed Cabdi Sugulle)

Tilmaan kala duwanaanta dadka uu gabayaagu sheegay iyo heerarka ay kala joogeen. Kaddib macne guud isugu soo ururi ujeeddada tixda.

Guurdoon haddaad tahay asaad guunyo bixinayso
Waa gaadan jiray inan ninkii goosan karayaaye
Gabadh waliba waa hooyadeed tay u gurataaye
Goonbaartu waxay caasidaa mid aanay gaadhayne
Ma gudboona gaarida sariyo gidirta naaxdaaye
Shakhsiyaadka ku jira tixdan gabayga ah midba gaarkiisa uga hadal?

Kaddib kuwa xidhiidh leh (isu ekaanshaha) sababee isu ekaanshahooda?

Kuwa aan xidhiidh lahayn kala duwanaashahooda sababee?

J. Goobaabta Maansada

1. Gabayga magaciisu yahay "Macaan iyo qadhaadh", waxa curiyey:
   B. Hadraawi
   T. Timacadde
   J. Sh. Ismaaciil
   X. Qaasin

2. Heesta "Umul baa illowdee", waxa lagu saluugsanaa:

   B. Gumeystihii Ingiriiska

   T. Midowgii Soomaaliland iyo Soomaaliya

   J. Xornimadii Jabbuuti

   X. Sooyaalka Soomaalida

3. "Walhadow guradiisa,

   Waaluu ii goglayaaye,

   Ma naagtay wacan baa?"

   Meerisyadani waxa ay ammaanayaan:

   B. Riyaha

   T. Fardaha

   J. Geela

   X. Awrta

4. Heesta "Beladweyn", waxa sameeyey midhaheeda:

   B. Gaarriye

   T. Hadraawi

   J. Xasan-ganey

   X. Sangub

5. "Iyadaa sibraarkeeda dheer, lagu socdaalaaye,

   Iyadaa safruhu jiidayaan, Saaxil tegayaaye",

   Meerisyadani gabaygii ay ku jireen waxa laga ga hadlayey:

   B. Lo'da

   T. Fardaha

   J. Geela

   X. Riyaha

6. Tixda magaceedu yahay "Dalxiis", waxa curiyey:

   B. Xasan Muxumed Qalinle

   T. Xasan X. Cabdillaahi

   J. Xasan Muxumed Tarabi

   X. Xasan Qalinle Caynaanshe

7. "Wuxuu leeyahay ramad buuxiyiyo, baarcaseey nirige",

   Gabaygii meeriskani ku jiray waxa uu ka hadlayey:

   B. Qiimaha Waddaniyadda

   T. Qiimaha Geela

   J. Qiimaha Fardaha

   X. Qiimaha Gobonnimada

8. Geeraarka "Casiisow waa mahaddaa" ee uu tiriyey Timacadde waxa uu ahaa sannadkii:

   B. 1991

   T. 1960

   J. 2001

   X. 1973

9. Gabayga "Ammaanta Riyaha", waxa tiriyey:

   B. Ismaaciil Mire

   T. Timacadde

   J. Qaasin

   X. Sh. Ismaaciil

10. Gabayga "Orod xoogso", Abwaanku waxa uu ku waaninayey:

    B. Xaaskiisa

    T. Wiilkiisa

    J. Madaxdiisa

    X. Ardaygiisa

CUTUBKA 4AAD: MAAHMAAHDA

WEYDIIMO

1- Qor mawduucyadan maahmaah ku saabsan midwalba?

b- Xididka

t- Shabeelka

j- Quudhsiga

x- Kibirka

kh- Degdega

d- Dugaaga

2- Qor shan maahmaahood oo saddexley ah?

WARCELIN

1- B- Xidid xigtuu eeday

T- Nin rabaystay shabeel riyuhuu ka cunaa

j- Quudhsigu qiil ma leeyahay

x- Raggow kibirka waa lagu kufaa

kh- Hadday degdegsiimo door dhalaan kaadsiimana kiish lacagay dhalaan

d- Dugaaggu waa is dir bahaystaan.

2- Saddex lala ma colloobo

Nin cagtaada yaqaan

Nin codkaaga yaqaan

Nin cidaada yaqaan.

Saddex way golacaddahay

Geed naago diirteen

Guri dayrta laga baxay

Goray baal dillaacsaday

Saddex lama arag

Bakayle tallaabsanaya

Belaayo laba qad ah

Badhi ciyi ah

Saddex weeyi hadalku
Mid ku mara
Mid ku mira
Mid ku muda

Saddex looma dhowaado
Dharaarin sabool
Dhaxdin reer xun
Dhuuni nin buka

Saddex madaxnimay ku seejisaa
Gacan gudhan
Gar leexsan
Guddoon jilicsan

Saddex way madawdahay
Nin magaanyo guursaday
Nin magaalo lagu dhacay
Habar madigii laga dilay.

ISBARBARDHIGGA, SHARRAXAADDA & FAHANKA MAAHMAAHDA

b) Milil dushiisa lama dhayo.

t) Dan iyo madaxaaga toona laga ma boodo.

1- Midee dulucda labadan maahmaahood. Adiga oo isu dhiraandhirinaya ujeeddada guud ee ka dhexeysa?

---

b) Dheri waa naaran yahay

t) Awrka rareeyo waa naaran yahay

j) Guurtina waa naaran tahay

2- Hal weedh ah ku soo koob saddexda weedhood ee kor ku xusan?

---

x) Dheriga kariyaha ayaa ka naar qaata

kh) Awrka ninka hoggaanka haya ayaa ka naar qaata

d) Guurtida garlaawaha xaq-darrooda ayaa ka naar qaata

3- Hal weedh ah ku soo ururi adiga oo aan lumin macnaha saddexda weedhood ee kor ku xusan.

Malee adiga oo maskaxdaada la kaashanaya saddexda ku naalooda. Fiiro gaara ka tilmaan qaado maahmaahda sare.

b) ---

t) ---

j) ---

Falanqee ujeeddooyinka ay xambaarsan tahay maahmaahdan sagaalleyda ah ee hoos ku qorani.

Saddex waa mugdi: Habeen, Colaad, Jiilaal

Saddex waa u maradhaamo: Dayax, Ergo, Caws

Saddex baa ka macaan: Dharaar, Nabad, Gu'

b) Is barbardhig saddexda mugdiga ah ujeeddada midaysay?

---

t) Caddee ujeeddada guud ee maahmaahdan sagaalleyda ah.

---

j) Sharrax isu ekaanshaha iyo kala duwanaanta maahmaahdu siisay, Dayaxa, Ergada iyo Cawska.

Shan nin oo muwaafaqo leh hal shanshaa ka go'da, shan nin oo aan muwaafaqo lahayna shan shanshaa ka go'da.

b) Sheeg dulucda ujeeddo iyo waxa loo adeegsado maahmaahdan?

---

t) Maxaa loo adeegsadaa goormaase la adeegsadaa?

Dumaali waa dabar carruureed.

Caddee waxa looga jeedo maahmaahdan.

---

1. Aqal hadal buu daahaaye hablo ma daaho

b) Dib u qor maahmaahdani sida ay sax ku tahay.

---

2. Nin gawracani geedo kama baydho

b) Si kooban u sheeg macnaha maahmaahdan.

---

3. Lafta gur xarragadana ha ka tegin.

b) Maxay ina faraysaa maahmaahdani?

---

t) Maxay inooga digaysaa maahmaahda kor ku xusani?

Akhri maahmaahyadan hoos ku qoran oo sheeg mid kasta dulucda macne eek u qarsoon gaar ahaan.

1. Bil saddex reerkaagana waa ay kaa saartaa reer kalena kuma geyso.

---

2. Geel waa ilo, naagana waa maxayley.

---

3. Oodi ab ka dhow

---

4. Laba biyo hoostood iska haraatiyay iyaga ayaa iska kaa og

b. Falanqee dulucda maahmaahdan?

---

5. Ninna korkiisa biyo kama hagrado.
   Xiniini xigaalkeed bay eedday.

   b. Faaqid kala duwanaashaha labadan maahmaahood?

   ---

   t. Si kooban u sheeg dulucda maahmaahda hore?

   ---

   j. Sheeg xilliga la adeegsado maahmaahda labaad?

1- Cirridkaan arkaayo ilko kama soo jeedaan.
   Kaboolaha aad kabo ka tolanayso kabihiisaa la eegaa.

b. Midee dulucda labadan maahmaahood?

2- Ina adeerkaa foolxumana waa kugu caayaa faayana kuuma oggola.

b. Faallo ka bixi dulucda maahmaahdan?

Guurku waa kol iyo kaftin

b) Soo bandhig sarbeebta ku qarsoon maahmaahdan?

---

b) Biyo sacabadaadaa laga ga dhergaa.

t) Ood kaa dheeri kuma dhaxantirto.

-Midee xidhiidhka ka dhexeeya labadan maahmaahood?

Maxaa ay u jeedday gabadhan ku maahmaahday,

Tol wada xurmo doonay iyo aqal wada xadhig doonay xayntaydaan ka raacday.

CUTUBKA 5AAD: HEES-HAWLEEDKA

B. Weydiimo toos ah

1- Mawduucyadan hoos ku qoran mid kasta ka qor hees-hawleed?

b- Kebadda

t- Cawska, harrarka

j- Aloolka

2- Qor hees-hawleed ku saabsan Kalluunka?

3- Qor hees hawleed ku saabsan beer falashada?

4- Qor hees hawleed ku saabsan dhaanka?

WARCELIN

1- B) Naagta kebadda laheey kaalin daraneey, adaan kayd u sii dhigan.

T) Cawskanoow sabool diidow hoyal

Wallaan suuqa lagu dhigineey

Soddon lagugu baayicineey

Yaa sameeyey lagu odhan

j- Dab nooleeye duur qalinlow

doc wanaaje daah walaalkiiyow

2- Tuuntuunsanow

Tunba meel dhigow

Tanaadow ku mee?

3- Inaan geeddi ka quustay

Oo u fadhiistay qodaalka

Bal sidaan u qodaayiyo

Qiyaastaydaba eeg.

4- Markuu dawga maraayo

Daadinaayo hoggaanka

Ma diyaarad sarkaaloo

Dagaal meel ku ogbaa.

Fiiro gaar ah: dhammaan weydiimaha tooska ah ee hees-hawleedda buuggan wax aka warceliyey Macallinka.
Qaybaha kale ee hees-hawleedda badh ayaa macallinku ka shaqeeyey ee xagga danbe Warcelinta ka tixraac.

FAHANKA GOORTA IYO UJEEDDADA HEES-HAWLEEDKA

T. Hees-hawleed walba ka soo saar astaamaha iyo magacyada muujinaya waxa loogu heeso.

Madawgaagiyo

Naag magaalaba

Waa maqaafoo

Waa ku meel gaadh

May-caskaagiyo

Wiilkii muruq lena

Waa ma guuraan

Madawgaagiyo

Madawga habluhu

Waa ku meel gaadh

Madawgaygiyo

Madawga cirkuna

Waa ma guuraan

Waxa aad yu'anaysiyo
Waxa aad ka yabaali
Yuhuunta haygu yarayne
Bartii yoolku ahaa iyo
Yudhii ceelka ku
tooseey.

_____
_____
_____
_____

Sidii gaashaan
Nin gurracan siddo
Gees gurracanlow
Saaka geeddigu
Waa gurracan
guur Oo la garan
waa.

_____
_____
_____
_____

Taltallaabsi gabdheedlow
Tagoogooyin haldhaaloow
Tafta wiilal ayaa lehe
Iska tiiri xamaanta

_____
_____
_____
_____

Daylooy dixidii
Dareemada
hawd Laysu
diidyoo Laysu
dacaree.

_____
_____
_____
_____

Haddii gelin hore
Geela lala tago
Gal-guduudiyo
Galka Hiiraan
Gabbal-gaabkii
Galaabixiyaay.

_____
_____
_____
_____

Abeer dhego weyn
Arooryada hore
Waa axlayn jiray.

_____
_____
_____
_____

Xayoow aabbahay baa
Muddo badan xayiri jirayeey

Aniguna xusuustii baan
Xidhka ugu jiraayeey.

Barqada iyo subaxdii
Marka aan badda u galo
Ballankii llaahay
Kani waa bayaadkii
Boqorkii kalluunka

Duurku nagu raagyoo
Waliba nagu rigrigaye
Ragga ma ugu yeedhnaayeey.

Ramashi geed saaraneey
Raaxo la hadhsadooy
Halkee buu rigrigaleeyeey
Geel ka reemaayeey.

_____
_____
_____
_____

Mooye geed la jaroo
Muuno loo qoray weeyi
Maqaarkii la aslaana
Masallaa la yidhaa
Naagtii maamul
taqaan Maakhiidaa la
yidhaa

_____
_____
_____
_____

Saddex maraanu leenahay
Midi waa malaawida
Midna waa
malaykaan Iyo
Maxamuudi noo taal.

_____
_____
_____
_____

Dirir oo dud oo muudso
Reeraha mir oo
mayrac Oo midigta
kaga kaalay Oo
murudna ha u reebin.

Ma haddaan habaroobay
Habaroobay habaroobay
Hooyaday hooyadeed
Mar haddaan la masoobay

Waakan soo biliglee
Baasha ka onkadaayee
Bidhaan dheere roob bariyeey.

Sidii Xaadsan gabdheed
Ama xoolo danley
Kaalay Dhiinle-xariiroow
Ma xooday ku bareen

Jeeroo uu cirku hooro
Haamaha kaa dhigi maayo
Anna kaa hadhi maayee
Hanjajaaqsiga daayeey.

Gadh nin gobaley
Gabooya-coleey
Gurdan farasley
Goojiyaa timid.

Tuuntuunsanow
Tunba meel dhigow
Tanaadow ku mee?

Maad booddo gaabnaynoo
Waad baxsan lahaydeey
Wiil soo biyeystiyo
Beydar baa ku beegsadayeey.

Aaran uurweyn
Oo aleemo leh
Oon ordi aqoon
Aar ha laayee
Awr xunbaa
dhalay.

Dumar dhibe
Ragga dhaye
Dhimanaye
Soo dhac.

Nimaan maydi kuu guran
Moxorkuna u dheerayns
Masruuf ma kaaga adagyahay

Haanyahay dayaan
Dayaan oo diririglee
Dayaan oo duul u yeedh
Dayaan oo doox ka yeedh

J. Fahanka hees-hawleedda goorta iyo waxa loogu heeso.

Akhri hees-hawleedyadan soo socda oo fahan dulucdooda macne, kaddibna ka jawaab weydiimaha ka danbeeya.

1. Hootadaadiyo

Naag hunguri xumi
Is kuma habana
Is mana huraan
Hadhaagaagiyo
Hal dhurwaa ahi
Is kuma Habana
Is mana huraan
Hormadaadiyo
Wiil huleelaa
Is kuma Habana
Is mana huraan

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

2. Saddex weedhood

Oo war lagu helo
Weynow kaa hay
Weerar baa galay
Wiilkii jiray dhimay
Weyli kama hadhin

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

3. Geerida haween

Guud la feedhiyo
Guursi laga qaad
Geeridaydana
Gorof madhan iyo
Gaajo laga qaad
Geeridaadana
Guryo ba'ay iyo
Goblin laga qaad

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

4. Naag aan siigada

Ka sisimanoo
Sariir dheeriyo
Salli ka lahayn
Ana kuma siin
Adna kuma samid

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

5. Ayrooy odayadu

Ood ma gooyaan

Hadday gooyaan

Way la luudaan

Oo la liicaan

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

6. Haddaan kaa xarragoodo

Xodha kaa laban-laabto

Halkeen xoolo u doonan

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

7. Jeeruu sacabada

Sarta kala baxo

Ama sararada

Suuman adag iyo

Seedo kala jaro

Sidaa kuma tago

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

8. Waqaan shallow lagaa mudin
   Shilal dheer laguu dhigin
   Habro kugu shaloombiyin

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

9. Wallee magadow
   Anaa ku mutoo
   Muquuniyo bixin
   Maalis iyo dhaqid
   Midna kuma samid

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

10. Saddex seeddiya
    Oo salaantiyo
    Sooryada iska leh
    Suufka xooraay

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

11. Markuu suruqdiyo

Arko saxarada

Sanka mariyoo

Surka kor u taag

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

12. Meel bur cawsa leh

Oo biyo u dhaw

Baadidoonyoo

Biciidkuba waa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

13. Wallee jeeni halaq

Haddaad hayshiyo

Horaaddada lulin

Wallee la hadhoo

Wallee la halow

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

14. Daruur baa inna dul joogtee
    Daag baa inoo shiniyeysane
    Sida haadda u duuloo
    Degdegoo cagta qaad

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

15. Dhoodi buu marayaayoo
    Dhul fog buu tegayaayoo
    Nin dareemo dhufsiiyay
    Dixi sii dhereg daajiyo
    Shan jir dhuuxu adkaaday
    U dhuroo badhidiisa
    Sida dhuuxa cabsiiya
    Haddii dheeho la qaado
    Ku dhabaandhabkii qaashoo
    Uu la soo dhiciyaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

16. Ma caddee ha caddaato
    Caano geel ha u ekaato
    Culimaa cuni doonta
    Iyo caalim wadaad
    Iyo coofle barbaare
    Iyo reer curadkiiye

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

17. Laba qaar laguu kala jar
    Laba qaalin kula buube
    Geeljire ku qooraansay

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

18. Naag xumeey xadhiggaa go'
    Ninkeeday xamataayoo
    Intay shuuro xun siisay
    Wuu xalleebay tidhaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

19. Naag aan daah xidhaneey
    Doca dallooleey
    Ninkaagii dabayshoodyeey

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

20. Waadigii gebgeblaayee

Gundhinaayay harqoodkee

Goortu goortii ha gaadho

Goortii caarre ha gaadho

Casar gaaban ha gaadho

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

21. Aaran uur weyn

Oo aleemo leh

Oo ordi aqoon

Aar ha laayee

Awr xun baa dhalay

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

22. Saddex lagu baray

Waa ba'aagee

Barqo subaxnimo

Burka cawska ah

Balli aan gudhin

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

23. Hormo gool lihi

Horid kululaa

Oo ninka hayaa

Hawl u adagaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

24. Jilba gaabane

Jaawa geel buu

Jees u dhaamaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

25. Adiyo daar toban albaable

Adiyo deeblaha la maalo

Adiyo doonnida mug weyn leh

Adiyo waxa dunida yaalla

Haddii la i dooransiiyo

Ma doonee adaan ku doortay

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

26. Ragga caatadu gaadhiyo
    Awrka caynku u gooyay
    U calaacali maysee
    Xadhig caaradu duushiyo
    Abjed awrku cantuugay
    U calaacalaysaaye

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

27. Haddii herer dumo
    Oo halayo gudho
    Oo hadhyare qudhac
    Hoosta ka engage
    Oo hareeriga
    Hablo diirtaan
    Adaa hoogaye
    Xaggeed hadh u dayan

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

28. Waar miyaan dacwinaayoo
    Duleedkaan u baxnaa
    Mise waan dirirnaayoo
    Dulle dheer la baxaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

29. Habaar qabihii
    Hooyadaa dilay
    Yuu ku heerine
    Horey uga hoyo

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

30. Nin leggaa cunay
    Oo lugna u taal
    Ma ledaayoo
    Ma luloodaa?

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

31. Allahayow nin laba raray
    Labana u raamsanaysaa
    Ruux gooyo weynaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

32. Hadduu giir yahay
    Oo uu geesaha
    Soo yar godan yahay
    Waaban garannoo
    Waa guryahayaga

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

33. Gahaydh-maayada
    Geelu ku lama leh
    Ha gawgawdhine
    Garooy guro oo
    Aayar googoo

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

34. Hadhow bay odhan

La iima heesine

La ila ma hadline

Doob hurdaa i helay

Oo ii hagar bixin

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

35. Naagta kebadda laheey

Kaalin darraneey

Adaan keyd u sii dhiganeey

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

36. Tuuntuunsanow

Tunba meel dhigow

Tanaadow ku mee?

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

37. Nimaan maydi kuu guran
    Moxorkuna u dheerayn
    Masruuf ma kaaga adag yahay?

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

38. Galaalo ilmaha
    Gosha geliyoo
    Geed hadh weyniyo
    Galool u hadh gee

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

39. Ma fayoobid oo ogiye
    Faro ku gu ma yaallaane
    Hilaygiina lama furine
    Ma furkaa lagaa nuugay

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

40. Saddex boqol iyo
Sagaashan habeen
Oo sidkaa yahay
Sabool kuma sugo
Oo ku soo saar
Anse kugu simay

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

41. Dab nooleeye duur-qalinlow
Doc wanaaje daah walaalkiiyow

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

42. Daylooy dar madhan
Oo doqon ku jiro
Ha u soo durdurin
Waa lagu duryaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

43. Wiil magaalada

Soo maraan maray

Oo mijo cas helay

Maalintii ceel

Ku mitamin waa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

44. Cawskanow sabool diidow

Wallaan suuqa lagu dhiginoo

Soddon lagu gu baayicinoo

Yaa sameeyay lagu odhaneey

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

45. Markuu dawga maraayo

Daadinaayo hoggaanka

Ma diyaarad sarkaaloo

Dagaal meel ku og baa?

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

46. Ceel aan kuu galay
    Ciil uma qabtide
    Mala cawskay
    Carruuraha jaan
    Kaa celceliyeen

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

47. Muxuu odayaal
    Aleefaad iyo
    Ayda kaga tegay
    Oo anna i sigay

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

48. Gacantayda kuma goosan
    Gacalkayna ima siinin
    Waa gorof aan xooleeyay
    Oo guri ka soo qaadday.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

49. Daylo xaaxooy

Xalay waxan kacay

Adoo lagu xidhxidhay

Oo tuug ku xaday

Oo xerada yaal

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

50. Ma durduur buu

Doonayaayoo

Ma dareen buu

U diyaar yahay.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

51. Alla waa xujooy oo waa xujooy

Geel xerada diiddaa waa xujooy

Xero kale ka ololaa waa xujooy

Alla waa xujooy oo waa xujooy

Faras xerada diidaa waa xujooy

Xero kale ka dananaa waa xujooy

Alla waa xujooy oo waa xujooy

Gabadh xilaha diidaa waa xujooy

Xeelad bay ka wadataa waa xujooy.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

52. Jiilaalkii dheer

Jaawooy adigiyo
Wiilkii jamallaa
Jiidhku hadhayaa
Oo la jecel yahay

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

53. Dayr dhalkaagiyo

Dayr nin guursaday
Dagaagilanyoo
Lafta duudkiyo
Daamankaa xagan

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

54. Mar aan maqaafiyadiyo

Malaawidayda xidhanahay
Moohaarna buuxsamo
Waxaan ahay mulkiilaha
Loo soo macaash tago.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

55. Afartaad ku dhaqaaqdiyo

Dhaayahaad wax ku eegtiyo

Dhabarkaad wax ku qaado

Rabbi kaama dhantaalo

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

56. Aroos kama gelin

Awrna kama raran

Abeer ibo yare

Abaalse i mari.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

57. Saddex maraneey

Saddex ma ogtahay

In sibraar qoyay

Oo sange cayilay

Oo rag sare tagay.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

58. Sida doonni shiraacan
Oo shamaalkii badda joogta
Sheedda la inaga daaway.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

59. Marka khaydka aad tuurto
Tabaadinna kuu galo
Tawaabay tawaabay
Tamar iyo xoog ku soo jiid.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

60. Dumarkaa garba-saarta
Iyo ku shaqeeya garayska
Ragna waa gunti gaaban.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

61. Marka reerka la joogo

Raggu waa iska raguun
Marka beerta la joogana
Qaar ayaa riyo nuugoo
Xagga reerka u yaaca.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

62. Lo'eey ladaneey

Ladaaban ogeey
Labaatan cishiyo
Labaa lagu qadin.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

63. Sidii buufimo

Birta la hor dhigay
Buuf tumaallow
Buuftu ma adaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

64. Daylooy dixidii

Dal wanaaggii

La isu diidyoo

La isu dacaree

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

65. Boorow naaguhu

Barqo joogsiga

Bariisada hore

Kuu buraanbure

Waase beentood

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

66. Dhiin-caskaagiyo

Naagtii dhaban laa

Loo dhacdhacayaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

67. Qamareey qorqode

Wuu qayliyaa

Wuu qayliyaa oo qalaxtamaa

Rida qal oo qari buu yidhaa

Qiiqu yuu bixin buu yidhaa

Qaali qoryo u diro buu yidhaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

68. Sidii bahalkii

Baabusha lahaa

Meel bannaaniyo

Boodh is legadooy

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

69. Koronkor cuni maynoo kariba maynee

Karuur geel ma la hayaayeey

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

70. Awlalka xarkagay

Ee xayaabada

Xagga hoosiyo

Xagga sare ku leh

Xaaxeey mooyee

Xoolo kale ma leh

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

71. Jiica webigiyo

Jeerin kuma mudo

Oo ku gu ma jabo

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

72. Allahayow nin laba raray

Labana u raamsanaysaa

Ruux gooyo weynaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

73. Kabaalo dhuyuca

Oo mid dhebi yahay
Midna dhamas yahay
Ku dhukayatooy

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

74. Haddaad gaadhoo gabowdo

Haddaad geeliina raacdo
Haddii guluf kugu yimaaddo
Mar uun baad go'i lahayde
Ma go'e geela ha uga cararin

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

75. Sidii naag hunbaniyoo

Hadhuudhkii ka xumaaday
Maxaad ii hadimaynee
Hoosta iiga habaari
Ma anigaa hadhimeeyoo
Halkii kaaga danbeeyoo
Hiraabtii dabadeed
Hooyaday wax i siisay.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

76. Ma wax kalaa la fuulaayoo
Fadhi lagu kireeyaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

77. Gacalooy gacalooy
Gabadhayda yareey
Haddaan geel kugu waayo
Iyo guunyo la maalo
Iska guudad dabnow
Aabbahaa garab joog
Hooyadaa u gargaar.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

78. Habeenkaan gudo
Een guryaha maro
Een garayskiyo
Guntiga u furo
Garaad badanuhu
Waa igu garan jiray

.

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

79. Haddaan dhidibada
    Dharaar iyo laba
    Looga dhaantayn
    Miyey dheregtaa?

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

80. Cirku caad ma leh
    Ceelku biyo ma leh
    Dhulku caws ma leh
    Kaagan ciyayee
    Calaacalayow
    Muu cawadii sugo

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

81. Gadh-nin goboleey
    Gurdan farasley
    Gabooya colleey
    Goojiyaa timid

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

82. Ido waa miyire

Madaxa ha ka qoyn

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

83. Naa yaan ku baalidine

Yaan bawdka kuu dhigine

Baranbaradu kugu xayane

Baayooy bullooy ii bax

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

84. Casaan beylow

Casar reer degay

Oo col la ahaa

Cabsidaan qabay

Hadba carar iyo

Ma ii cirbixisaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

85. Abeer dhega weyn
    Arooryada hore
    Waa axlayn jiray

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

86. Marka dooggu caddaado
    Dhir caleeni ka duusho
    Caddaawow labadeennaa
    Reerku ciidansadaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

87. Bariiska reer magaalee
    Badda looga tallaabay
    Waa kan oo la budeeyoo
    Buushihii laga saaray

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

88. Haddaan kaa xarragoodo
Oon xodha kaa labanlaabto
Xaggeen xoolo u doonan

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

89. Awdal laga keenyeey
Alalag dheereey
Ilbari lagaga soo oriyeey

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

90. Waa kan soo biliglee
Baasha ka onkodaayee
Bidhaan-dheere roob bariyeey

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

91. Maad inoo ducayseeneey hoyal
Mise waan duceeyaayeey hoyal
Cirka roob darroor dhaha'eey hoyal
Duunyo caafimaad dhaha'eey hoyal
Dalka nabadgelyooy dhaha'eey hoyal
Hoobiyoow hoobaaleeyoow hoyal

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

92. Marka seban dhaco
Sacna weyl gabo
Suubeey lagu sidig

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

93. Inta giir-bey
Gees madow yahay
Geelow yeelkaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

94. Saawiri mudyow

Solay laga dhigyow

Dumar saafayow

Raggu sahayayow

Sumalkii dhalaan

Sida loo socdiyo

Sunsunkaba aqoon

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

95. Bilee qaajuhu

Qorraxowyoo

Qaar danbeedkiyo

Qanaanta hadhmoo

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

96. Carruurtii yaryarayd iyo

Culimaa ajar roone

Nin cajuusad u dhaanshay

Muxuu ciil iyo wey iyo

Citibaaro qabaa

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

97. Walanwalcaaleeyeey

Waaxyo daylooy

Warqado doonniyaadleeyeey

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

98. Inan inan ka weytahayeey hoyal

Hooyadeedna nooshahayeey hoyal

Oo warwareegta waan nacayeey hoyal

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

---

99. Haddii herer dumo

Oo halayo gudho

Oo hadhyare qudhac

Hoosta ka engego

Oo hareeriga

Hablo diirtaan

Oo higlada bari

Libaaxu hadhsado

Adaa hoogaye

Xaggeed hadh u dayan

b) Maxaa loogu heesaa hees-hawleedan?

---

t) Goorma ayaa loogu heesaa?

CUTUBKA 6AAD: DHISME-AFEEDKA (NAXWE) IYO EREYO.

1- Waa maxay Naxwaha?
2- Sheeg shan qaybood oo ka mid ah qaybaha hadalka?
3- Maxay ku kala duwanyihiin magaca guud iyo ka gaar?
4- Maxaa lagu gartaa magaca lab ee Afsoomaaliga?
5- Waa maxay magac lakabeedku?

WARCELIN

1- Naxwuhu waa habka iyo hannaanka dhisme ee Afsoomaaliga.
2- B- FALKA
   T- MAGACA
   J- FALKAABKA
   X- MAGACUYAALKA
   KH- XIDHIIDHIYAHA.
3- Magaca guud waa mid u dhexeeya waxyaabo badan, magaca gaarna waa mid meel ku saabsan oo la isla garanayo.
4- Waxa uu qaataa qodob lab.
5- Magac lakabeedku waa laba magac oo midoobay.

BUUXINTA, KALA SOORIDDA IYO BEDDELKA.

1. Akhri oo fahan saddexdan weedhood ee hoos ku qoran, ka dib ka jawaab weydiimaha ka danbeeya.

   - Cali waa uu yimid.
   - Qorraxdu waa ay dhacaysaa.
   - Geelu waa uu foofaa.

b) Ka soo saar saddexda weedhood.

- Falalka ku jira?----------
- Magac-u-yaallada ku jira? ----------
- Yeelayaasha ku jira? ----------

t) Qor weedh kasta gooraynteeda (amminteeda) falkeeda?

- Weedha 1aad:
- Weedha 2aad:
- Weedha 3aad:

2. Isugu soo ururi weedh keli ah
    - Caasha waa ay tagtay suuqa.
    - Iyadu waxa ay soo iibsatay khudrad.
    - Caasha waa ay ka timid suuqa.

- Waxa aan ka qaybgalay aroos.
- Aniga iyo Idiris waxa aan ku kulannay aroos.

- Faarax waxa uu iibsaday gaadhi cusub.
- Isagu waxa uu kaxeeyay gaadhigiisii cusbaa.

- Macallinku waxa uu soo galay fasalka.
- Isagu waxa uu ku qoray sabuuradda cashar.
- Macallinku waxa uu ku fadhiistay kursigii.

3. U samee astaamaha ka maqan weedhahan hoos ku qoran.
   - Waar ii gargaaraay
   - Barihii ayaa yimid fadhiistay hadlay oo aammusay
   - Qalin cusub cas oo gaaban buug madow yar oo duug ah iyo xaashi jeexjeexan cad oo xun ayaa uu haystaa.
   - Dawladdu waxa ay muujisay karti abaartii xumayd ee dhabarjabka ahayd darteed

---

---

4. Akhri weedhahan hoos ku qoran oo ka warceli weydiimaha ka danbeeya.
   - Alaabtii waxa la saaray gaadhi-dameer.
   - Cabdillaahi waxa uu saaxiibkii u la hadlay si kulul.
   - Kal hore ayaa la guursaday Canab.

b) Sheeg ammin faleedka ka dhexeeya saddexda weedhood?

---

t) Ka soo saar saddexda weedhood meeleeyaha ku jira?

---

j) Ka soo saar weedha labaad falkaabaha ku jira?

U beddel wadar ereyadan kelida ah

1. Mareeg: ---
2. Midig: ---
3. Bidix: ---
4. Biyo: ---
5. Caano: ---

Astaamayn:

Gabadha fadhida xafiiska akhriyeysa wargeyska cabbaysa liinta ee u sheekaynaysa saaxiibbadeed waxa u yeedhaya agaasimaha

b) Dib u qor weedhan kor ku qoran kaddibna u samee astaamaha ka maqan.

---

b) Kala saar ereyadan adiga oo u eegaaya goorayntooda (ammintooda)

1- Sameeyaa----------
2- Tegay ----------
3- Noqday----------
4- Cabbaa----------
5- Joogay----------
6- Seexdaa----------
7- Cunaa----------
8- Ciyaari doonaa ----------

t) U rog falal ereyadan magacyada ah

1- kirayn----------
2-midayn----------
3-isirayn----------
4-shidid----------
5-caddayn----------
6-caanayn----------
7-biyayn----------
8-sugid----------
9-maaweelin----------
10-xoogid----------
11-casayn----------
12-wadarayn----------
13-dilid----------
14-caawin----------
15-huwin----------

j) Hoosta ka xariiq ereyada falkaabyada ah ee ku jira weedhahan hoos ku qoran.

1. Si xun baa ay Cibaado u qoslaysay
2. Cali aad baa uu u ooyay
3. Halkan ayaa ay barayaashii fadhiyaan
4. Gabadhu xoog ayaa ay u qaniintay wiilka
5. Berri ayaa ay ciyaartu garoonka ka dhacaysaa
6. Weftigii waxa ay soo mareen maanta
7. Shalay waxa aan tegay Gebilay
8. Si ba'an ayaa ay kubbaddu ugu dhacday wiilka
9. Beryahanba waa aan ku sugayay
10. Halkan igu soo mar marka aad soo anbabaxdo.

x) Dib u qor astaamayn iyo xarfaynta meerisyadan hoos ku qoran.

Kaliil baa waxa uu ku tiraabay waar warsame baarow ma sidaa ayaa rag yeeli jiray Warsame ayaa u celiyay maya wax weliido dhacay ma aha ee waa xaajo ugub ah

---

---

d) Goobaab jawaabta saxda ah qaybtan naxwaha ee hoos ku qoran.

1. Ereygu waxa uu ka kooban yahay

   b. xarfo isu tegay
   t. weedho isu tegay
   j. ereyo isu tegay
   x. xarfo iyo ereyo

2. Weedh dhiman iyo weedh dhan waxa u dhexeeya
   b. weedhaha oo kala badan
   t. macne dhiman iyo macne dhan
   j. macne kooban iyo mid fidsan
   x. macne qotodheer iyo mid fudud

3. Falku waa erey hoggaamiya
   b. sifada weedha
   t. isku xidha weedho dhaadheer
   j. weedha
   x. laamaha weedha

4. Meeleeyuhu waxa ka mid ah
   b. ka, la iyo soo
   t. ga, ta iyo ka
   j. soo, ta iyo ka
   x. sii, ga iyo ta

5. Falkaabuhu waa erey
   b. ku lid ah falka
   t. caawiya falka
   j. ka horreeya magaca
   x. ugu danbeeya weedha mar kasta

6. Magacu guud ahaan waxa uu u qaybsamaa
   b. saddex nooc
   t. laba nooc
   j. hal nooc
   x. afar nooc

7. Magac-u-yaalku waxa uu galaa
   b. kaalinta falka
   t. kaalinta la yeelaha
   j. kaalinta magaca
   x. kaalinta tilmaamaha

8. Ereyga qodobka ahi waxa uu galaa
   b. dhammaadka magaca
   t. bilowga magaca
   j. dhexda magaca
   x. waa horgale

9. Ereyga sifo ama tilmaame waxa uu wax ka sheegaa
   b. magac-u-yaalka oo qudha
   t. magaca
   j. falka
   x. falkaabka

10. Yeeluhu waxa weeyi
   b. waxa weedhu ku dhammaato
   t. qodob
   j. waxa weedhu wax ka sheegayso
   x. waxa ereygu ku dhammaado

11. Magac-u-yaalka qofka 1-aad (keli) waxa ---------- tegayaa Berbera.
   b. aan
   t. uu
   j. ay
   x. aydin

12. Magac-u-yaalka qofka 2-aad (keli) waxa ---------- imaneysaa Hargeysa.
   b. aydin
   t. aad
   j. inaynu
   x. weydin

13. Magac-u-yaal qofka 1-aad (wadar) waxa ---------- tegaynaa Burco.
   b. aan
   t. aydin
   j. aannu
   x. uu

14. Waxa aan u socdaa Boorama hadda.
   b. waa fal tegay weedhu
   t. waa fal soo socda
   j. waa fal jooge-tage
   x. waa fal jooge

15. Haddii Alle yidhaa waxa aan subaxa ku tukan doonaa Masaajidka.
    b. fal soo socda
    t. fal jooga
    j. fal tegay
    x. fal aan joogin

16. Wixii tegay ayaa aan la hibateeyay.
    b. fal soo socda
    t. waa fal tegay
    j. waa fal jooga
    x. waa fal jooga oo tage ah

17. Ereyga afka soomaaligu marka uu ugu yar yahay, waa marka uu yahay
    b. fal tegay
    t. fal jooga
    j. fal amar
    x. fal uun

18. Tallaabada --------- qaadaba wadnuhu taw ku soo odhaye, magac-u-yaalka meesha bannaan ku habbooni waxa weeyi,
    b. aan
    t. aad
    j. uu
    x. aannu

19. Ciyaaraha gobollada Soomaaliland ee sannadka 2016, waxa -------- ka dhaceen Hargeysa.
    b. oo
    t. ee
    j. ay
    x. uu

20. Xidhiidhiyaha "iyo" waxa uu isu xidhi karaa laba

b. tilmaame

t. fal

j. magac

x. magac-u-yaal

r) Ereyadan falka ah ee hoos ku qoran midkasta geli weedh hufan (sugan) oo gooraynta falkeedu uu yahay waqti tegay oo dhacaya.

Dhaami, Buuxi, Kaxee, Kari, Bood, Bakhtii, Dawee, Ulee, Cab, Farsamee

1. ----------
2. ----------
3. ----------
4. ----------
5. ----------
6. ----------
7. ----------
8. ----------
9. ----------
10. ----------

s) Ku buuxi ereyga "IMAW" adigoo u eegaaya gooraynta lagu siiyay.

		Joogto socoto	Tagto socoto
1. Keli	Waa	aan----------	_____
2. Keli		aad----------	_____
3. Keli		uu----------	_____
4. keli		ay----------	----------
5. wadar	Waa	aynu----------	_____
6. wadar		aydin----------	_____
7. wadar		ay----------	----------

Sh) U rog ereyadan falka ah magacyo

1. kaalmee: ----------
2. yeedhay: ----------
3. dawee: ----------
4. faallee: ----------
5. qor: ----------
6. kululee: ----------
7. shid: ----------
8. fududee: ----------
9. madoobee: ----------
10. badbaadi: ----------

EREYO IYO ODHAAHYO SARBEEBAN

b) Qor ereyadan dhiggooda (macnahooda)

1. Soohdin:----------
2. Hawraar: ----------
3. Foognaado: ----------
4. Halhaleel:----------
5. Tafaxayto: ----------
6. Gabbaati:----------
7. Yarad:----------
8. Dhibaad:----------
9. Kuunyid:----------
10. Gool:----------
11. Indha-daraandar:----------
12. Moodda-galabeed:----------
13. Masallo-gaab: ----------
14. Cabbaadhyo: ----------
15. Hiyi: ----------
16. Bootooyin: ----------
17. Xaddi: ----------
18. Sareedo: ----------

19. Danqaaro: ----------
20. Dalag: ----------
21. Harame: ----------
22. Yaxyax: ----------
23. Doogdhaw: ----------
24. Milge: ----------
25. Madal: ----------

t) Isla doono ereyada hoos ku qoran adigoo ku jawaab bixinaya tusaha hoos ku xusan.

1. Waaqla'	b) Gurmad
2. Jaantaarogan	t) Xisti
3. Dhalandhool	j) Socod dheer
4. Qaylo-dhaan	x) Cidla
5. Hagrasho	kh) Socod xilli kulul

Lanbar kasta hoos dhig xarafka jawaabtiisa sida.

1	2	3	4	5

j) Isla doono ereyada is leh ee B iyo T

B	T
1. Fool	1. Biciidka lab
2. Qalanjo	2. Hayin
3. Arbe	3. Weji
4. Haldhaa	4. Aar da'yar
5. Gurgur-qaad	5. Biiq
6. Gaani	6. Muran
7. Jiis	7. Doog
8. Saryan	8. Goray lab
9. Tigaad	9. Maroodiga dheddig
10. Asaraar	10. Maroodiga lab

x) Qor lidka ereyadan hoos ku qoran.

1. Hiimse-hiimse: ----------
2. Xarkagay: ----------
3. Qandooda: ----------
4. Carraabin: ----------
5. Ugub: ----------
6. Dhab: ----------
7. Laamadood: ----------
8. Lexjeclo: ----------
9. Jacayl: ----------
10. Ajo: ----------

Kh) Akhri weedhahan maldahan oo fahan, kaddibna goobo geli jawaabta saxda ah

1. Geesi il buu diriraa
   - b. Waa arrintii qaate
   - t. Waa ishii qaate
   - j. Waa ushii qaate
   - x. Waa oontii qaate
2. Waa daba geel
   - b. Waa faduuli
   - t. Waa fadhooci
   - j. Waa fudud yahay
   - x. Waa fidmo wale
3. Waa raran ku joog
   - b. Waa rays ku joog
   - t. Waa rooraaye
   - j. Waa reemaaye
   - x. Waa raaf-cadde
4. Boqol dhabbo uga ma leexdo
   - b. Waa deeqsi
   - t. Waa geesi
   - j. Waa aftahan
   - x. Waa bashaash
5. Carrabka ayaa aan cirka la gaadhi

b. Waa aan ordi
t. Waa aan farxi
j. Waa aan ooyi
x. Waa aan qosli

6. Cagaha wax ka day
b. Is nadiifi
t. Is daawo
j. Orod
x. Dhammaan

7. Wadnaba ma laha
b. Waa dagaalyahan
t. Waa fulay
j. Waa cawaandi
x. Waa geesi

8. Waa cag ma dhiga
b. Socod yaraan
t. Socod ma leh
j. Socod badnaan
x. Soo ma hoyato

9. Booddo ayaa uu leeyahay
b. Damqasho
t. Dareen la'aan
j. Degdeg
x. Daryeel

10. Ilkaha ayaa xaaraantimeeyay
b. Qof kulul
t. Qof wanaagsan
j. Qof caajisa
x. Qof shaqo badan

CUTUBKA 7AAD: AFKA MALDAHAN (HUMMAAGYO)

B. Weydiimo toos ah

1- Waa maxay Duurxulku?

2- Si kooban u sheeg tilmaanta lagu garto Ekeeyaha?

3- Qor tusaaleyaal tix ah oo Shareere?

4- Si kooban u sheeg tilmaanta lagu garto Buunbuuninta?

5- Faallo kooban ka bixi tilmaanta lagu garto Qofaynta?

6- Qor tusaale Lagaado/Quusin ah?

7- Qor tusaale Yamxeero/Dayro ah?

8- Si kooban u sheeg tilmaanta lagu garto Sillan-sugan?

9- Si kooban u sheeg tilmaanta lagu garto Xus?

10- Qor tix tusaale u ah Astaan?

11- Si kooban u sheeg tilmaanta lagu garto Sarbeeb?

WARCELINTA

1- Waa hadal ama hawraar ujeeddo fog leh oo waxa laga hadlayo waxaan ahayn loo soo dhexmaro.

2- Ekeeyaha waxa lagu gartaa marwalba laba hummaag oo la isku ekaysiinayo ayaa ka muuqda.

3- "Ayaan noolba tii qaylisaa waa ibleys falane,
Irdho qaado aashaana soco, aayar hadalkaaga"

4- Waa tix meerisyadeeda ay ka muuqato ka badbadin ammaaneed.

5- Qofaynta waxa lagu gartaa waxa lala hadlayo oo aan qof ahayn.

6- Faadumo-hillaac (gabadh madow oo loo bixiyo)

7- "Ma tallaabadaan la qadhqadhoo, tiigsi lugo moodday"

8- Waa odhaah ama tix ka kooban weedho iska soo horjeeda.

9- Xus waa tix hal-abuurku u adeegsado inuu ku soo bandhigo qiso hore u dhacday.

10- "Aan maallo hasheenna Maandeeq"

11- Waa tix inta badan loo adeegsado hal-xidhaale.

Fiiro gaar ah: dhammaan weydiimaha tooska ah ee Hummaagyada ama maldahanaha buuggan waxa ka warceliyey Macallinka.
Qaybaha kale ee hummaagyada badh ayaa macallinku ka shaqeeyey ee xagga danbe Warcelinta ka tixraac.

GARASHADA HUMMAAGYADA TIXDA

MALDAHANAYAASHA (HUMMAAGYADA)

T. Sheeg Hummaagga ama Afka maldahan ee tix walba la adeegsaday

Wax badan baan sidii igadhka geel ololay xeeshay'e
Wax badan baan anfaco lay dhigiyo oon ka haajiraye

Cirkoo soo galgaaliyo hadduu godol cusbooneeyo
Guulaamo wuxuu soo kacshaa geydha dabadeede
Gal biyo leh galgalin roob helaa galab la laacaaye
Anse webi ganaanaan ahoo laga geyoonayne

Sida qaalin geeloo
Cirka baarku gaadhoo
Galabtii carraabaha
Markuu gees u yara baxo
Midabkiisa gaarkaa
Sida loogu guuxaa
Ana kuugu goohaa

Meel ruuxdu gaadhoo
Aan raaf la dhiginnoo
Raaxiyo wanaagiyo
Risiq uu ka dheefsado

Marna rubad go'iisiyo
Uu libaaxa raanta leh
Rubad gooyo ii sheeg?

Ridaan badhaha jiilaal ku furay buurta dhaladeeda
Een baarqab le'ekow orgiga ba'an ku sii daayay
Ee waxarta beyga leh dhashay ee bidix ku laadlaadshay
Een buqulka caano ah ka dhamay sidigta oo biistay
Miyaa boojo geel lala simaa bixiso weeyaane?

Gacankii maroodiga ninkaan galab ka sii daayay
Isna gaws libaax igu ridaan gacalkay mooddaayay

Waxaan ahay muddeec camalsan oo maagista aqoone
Marna macangag laayaan ah oo miigan baan ahaye

Gumeysigu hashuu naga dhaceen gurayay raadkeeda
Guuraha habeennimo hashaan gebi walba u jiidhnay

Xubno toosanow neefku waa xaalad gooniya'e
Goortaan xusuus ugu noqdaa xiise ii qabane
Waxaan xarafka diineed ahayn igaga xeeldheere

Xubin rag oo is waajahay hadday xayga ka caddaato
Afku wuxuu la xoog yahay magliga xawda kaa jara'e

Hadba waxa mudh soo odhan adduun hal aanu moogayne
Maantana maxay noqon sidii Maxamed loo yaabye

Shifo waxaan lahayn oo la cuno sheeg haddaad garato

Hasha jilicsan iyo qaalmahaad wada jalleecayso
Mid ku joogso la isuma darsado laba jidhaamoode

Beri baa dadkuba qaawanaa oo dibed ku noolaaye
Ooy daaqayeen cawska iyo derista geedaha'e
Dareemada marbay ugu koreen duudka buuraha'e

Xaggani waa gog daboolan
Xaggani waa lafo guud leh
Xaggani waa gumbis gaar ah

Guullihii na abuurtayow
Gu' samaaday miyaa?

Nimay gaajo haysaa
Guri yimid duleedkii
Soddoh garasho dheeroo
Gabadheeda qabaybaa
Dhito godolo sheelayd
Ugu geysay meeshii
Isaguna guddoon yidhi.

Markay maqantahay
Magaalada dhami
Mugdi weeyoo
Way madowdee

---

1. Dhool bari ka muuqdaa
   Dhaan loo negeeyaa
   Adiguna dhiggiisii
   Ii soo dhalaashee

b) Sheeg afmaldahanaha ku jira meerisyadan

---

t) Sababee waxa aad ku dooratay

---

2. Isagoo harraad qaba se haro dhan guud jooga
   Inta uu hadhuub daro nimaan haakah odhanaynin
   Hilbo qalan hadduu haad ku dego ruuxaan ka hiraynin
   Ma anaa intaan hiilo bido hooto waran siiya
   Ma anaa intaan hawl u diro haatan hadhac waabta

b) Sheeg afmaldahanaha ku jira tuducyadan sare

_____

_____

t) Sababee doorashadaada

_____

_____

3. Iga dhimay ninkaad saacidaa lagu ma dhaataane
   Hadba dhuuni ruuxii situu daba dhaqaaqaaye

b) Sheeg maldahanaha ku jira meerisyadan

_____

_____

t) Sababee doorashadaada

_____

_____

4. Halabtii guduudneyd ninkeer, gaawe u hogaystay
   Haddaan hoogayeey kugu danbeyn hoorri baan ahaye

b) Sheeg hummaagga ama maldahanaha la adeegsaday

_____

_____

t) Sababee doorashadaada

_____

_____

5. Nolosha dunidu waa dabkee
   Haddii dabkii dhaxmoodo
   Maxaa lagu diiriyaa

b) Sheeg hummaagga la adeegsaday

t) Sababee waxa aad ku dooratay

6. Hiyigiyo shucuurtiyo codkii haadda kicinaayey
   Haasaawihii Timacaddaan hibanayaa qaare

b) Sheeg hummaagga la adeegsaday

t) Sababee doorashadaada

7. Taaha adhigu waa hadal
   Urta waa isu toydaa

b) Sheeg afkamaldahan ee meerisyadan

t) Sababee doorashadaada

8. Geela weeto irmaaniyo
   Weristii rimanayd iyo
   Waa albuu eryadaaye
   Wabar xoog le miyaa

b) Sheeg hummaagga la adeegsaday

t) Sababee doorashadaada

_____

_____

9. Inteennii kaloo maqan

Haddaad Xamar is raacdeen

Idinkoo itaal daran

Waa la arki doonaa

b) Sheeg hummaagga la adeegsaday

_____

_____

t) Sababee doorashadaada

_____

_____

10. Dhool caano laga soo lisoo yara dhanaanaaday

Nin dhadhamiyey waa garanayaa dhul ay qaboojaane

Ragga laxaha sii dhawrayoow dhaqasho waa geele

b) Sheeg maldahaadda meerisyadan kore

_____

_____

t) Sababee xulashadaada

_____

_____

J. Sheeg astaanta caddaynaysa Hummaagga ama Afka maldahan ee midwalba tahay.

Lamuunbe ma noola mana dhiman

Labada midna ha umallaynina

Muuqiiso lawaayo mooyaane

Inuu maqanyahay ha moodina

Afku wuxuu la xoog yahay magliga xawda kaa jara'e

Sidii cir ku hooray meel cosob loo
Cadceedi u soo baxdaad tahay

Nin dharmaanyo feedhaha u gashaa dhimanna noolayne

Sebannadanba may dhalan
Haddaan uurka lagu sidin
Mid aan kula simaayaa

Waxaan ahay nin aragaaga jecel aadna kuu necebe

Shifo waxaan lahayn oo la cuno sheeg haddaad garato?

Hasha jilicsan iyo qaalmahaad wada jalleecayso
Mid ku joogso la isuma darsado laba jidhaamoode

Hal i galay sidii ugacda goray ha igu gaadhnaado

Geelbaan maqaarka u sidaa maalin iyo layle
Maroodaan u cawsaynayaa maangad yuurura'e

Dur durkaa laga cabbaa
Biyihiisa lagu dabbaashaa
Hadduu durdurkii harraado
Darkee laga waraabshaa?

Dahabooy sidii madax guyoo muuqday baa tahaye
Marso curatay mood iyo hillaac miidha baa tahaye
Sida mayayga roob oo kalaan kugu masaalaaye

Ragga bixitimaayow bela la xijaabyow
Ayaantaad badbaadaan Aadan waa iga baab mida
Bishaaradu ha gaadhee bayaan waxa u tidhaahdaan
Sagaal hal oon ku bari baan baqal kuugu soo diray

Adaan jaallahay Samatarow kula jalbeebtaaye
Jid yaqaan tolkaa ahi dhulkuu , kula jifeeyaaye
Darmaantii aan geelii ku jaray, iga jaqaafowdey
Haddaan jare ku weec weecinlaa, ii jid bixi wayday
Xaggeen ula jalbeebtaa xakamaa, jalawle guudkayga

Gasiinkii la soodhigay haddaad , gal iyo daad mooddo

Sida yeyda hawd hurdada ma ledoo

Il baan ka hurdaa habeenkii

Waraabaha ka giigaan u diri, gacan salaameede

Isagaa ii gargaaroo dugaag, iiga gooniyahe

Haddaan garan gunnaan siin lahaa, goor iyo ayaan

Koofiloow adaa jiitayoon, dunida joogayne

Adigaa jidkii lagugu wacay, jimic la'aaneede

Jahanama lageeyoow haddaad, aakhiro u jihatey

Magaalada Berbera maalintii madasha loo joogay

Waxa tahay hillaacii mudh yidhi ee muuqday laba jeere

Gacalkeed ha waydee hadday geenyo kaa hebado

Uu haayir nooliba yaqaan heeradkay mirato

Heensaha inaad kala baxdaa saw hal gara maaha

Ayaan noolba tii qaylisaa waa iblays falane
Irdho qaado aashaana soco aayar hadalkaaga
Is ogow afkaagana yasiro edebtu waa doore

Balaf waxaan ku haystaa
Beri inuu waraabuhu
Dameeraha ka baqan jiray
Bal dhadhami dhegtaydaa
Bixisada ka keentoo
Weli waa ka baacsada

Habartii mardhooftee
Doonidu la dhacantee
Badda dheeligeediyo
Dhaxantiyo dabaylaha
Dhawawal ka qaadee
Iyadoy dhaqaaliyo
Nafba kala dhaqaaqeen
Salka dhigatey cidee
Dhulow kaama kaco tidhi

Diric naga ma madhan meesha iyo duudkii Nebigiiye
Inuu nagu daruurnaa halkiyo Cali Abii-Daalib
Dadku haatan waa wada ogyahay dunida joogaaye

Adduunyada waan ku soo ambadee
Halkii lay abuuray maan iman

In kastuu Madiino iyo Maka iyo Minna ku weyseysto
Waa la iga maray xaajigaa muxubadiisiiye

Marka fooli timaaddo gudo qarsiimo hadhay

Nimaan gini hayn go'aankeedoo
Hablaha goba gaadhleh baan ahay
Nin barwaaqo baal walba iska dhigoo
Ninbaahan baryaayabaanahay

Fiidmeerta duushaay
Farriintaydan qaadoo
Ha furfuran adoon arag
Farxaddii jacaykeen
Ku calool fayoobaa

Geeluba ugaasooy kolkuu, ayda miranaayo
Abeerkiisa naaxiya markuu, aaranku is waayo
Isagu ma kala aamusee, waysu ololaaye

Waddada loo maraa wad yaallaa
Wardheer dalwanaagsanaydee

Fiinyahay adaa ololayoo oohin ciirsadaye
Haddii aan laguu iman waad aamusi laahayde
Maxaad aragtey waan kula qabaa uur-kutaalad'e

Daab gudimo weli sooma
goyn wiilashaan diraye

Waryaa xamar feked
Inaad fariid tahay
Fiirinta indhaha
Fadhigaagiyo
Feedha laga garey

Seed geel ma hilib baa?
Sako adhi ma xoolaa?
Sakaraad ma loolbaa?
Fardhaxaad ma suulbaa?
Biyo sare u jeedaa
Halkeebay ku sugan yiin?

Qoriyow hawaawi dhacaaga
Qoriyow halkaad cuskataaba
Waa haar jidhkayga kutaalla

Surinkaan maraayaba dhulkaan, samay kajeexaaye
Salaaddaha sunniyo faralkii, waan sahwiyaaye

Badduba marbey caariddaa, ciidda la arkaaye
Caga-weynoow maroodiga marbey, caaro legedaa
Cooflow libaaxaba marbuu, cunaa waraabuhu

Danbarkeeda maandeeq markii weelka lagu duugay
Durduur iyo rakaad caanihii duul yar baa dhamaye
Dibjirkii u soo diriray iyo doobkii la illawye

Dhillowyahaynkan geedkii
Lagu beeray dhididkiyo
Dheecaanka wadhatada
Dhexda tolow iskagamarey
Dhirta maw abtiriyaa

Carmashii hortey guursatee, geedo soo shidatey
Ee iga gu'weyn ee taqaan,gaadmo iyo dhuudmo
Waxay gogosha ii saxartirtoo, ila xidh goysaaba

Gadaal bay lasoo bixi wacdaro, hore ugu gaaraaye
Intey galab i aynabi lahayd, guur aan ka la'aado

Tin madow miyaa laga dayey, aniga tuurkayga
Matallaabadaan la cabsadoo, tiigsi lugo moodday

Gegidii uu yaallaay
Xareeddi kaama sal guurto
Waraabihii gundhinaayoow
Hagaboobin weligaa
Gorgorkii ka giigow
Gawsuhu kaama dhacaan

Kurku awr uu go'ay waa horaan, ii kac leeyahaye
Kalluun baan ka raadshaa af-meer, looga kacay oon

Doc kastaba adduunyada
Waxa shidaa dab weeyee
Hadduu dabkii dhaxmoodo
Maxaa laguu diiriyaa?

Nimanyahaw ciraab laguma kaco curuf la'aaneede
Cod xidhaal ah oo wada cajaba cayn aan ka higgaadsho
Wax cad oo madow baan arkaye cara'e yaa sheega?

Annagaan ciraab li'i ku kicin curuf la'aaneede

Cod xidhaal ah oo wada cajab ah cayn aan ka higgaadsho
Wax cad oo madow saw indhaha Ina Carrow maaha

Casar gaaban qorraxyahay
U sii faana-guratee
Godka weeraraysaa
Go'e fule miyaa tahay?
Waa maxay garmaamada
Iyo shaambis geeddigu?

Waxaan dheefsadaa xumaha
Wanaagguna waa i dhibaa

Waxaad iila bilic tahay
Beeraha Wajaaloo
Balliyada xareeddiyo
Togaggii burqanayaan

Beenaale ma tihide
Runta barashadeedaa
Belo kaa hor joogtaa

Cuqubadu halkii lagu galay caw ku huruddaaye
Carruurtay ka laysaa ninkii caano baas dhama'e

Nin ku yidhi sinnaan mayno
Adna buri sarreyntiisa
Sidka waad wadaagtaane
Ma sagaashan baa kiisu

X. Qeex Afmaldahan (Hummaagyadan), mid walba adigoo raacinaya tusaale tix ah oo ku habboon?

1- Xus

2- Duurxul

3- Ekeeye

4- Buunbuunin

5- Jeesjees

6- Sillan-sugan

7- Astaan

8- Quusin

9- Shareere

10-Sarbeeb

11-Yamxeero (Dayro)

12-Qofayn

CUTUBKA 8AAD: KASMAAL IYO AQOON-KORODHSI

B) WEYDIIMO DIINI AH:

1. Immisa goor ayaa Nebigeenna suubban ee Muxamed (SCW) Qur'aanka Ilaahay ku xusay? Sheeg magacyada Qur'aanku ku sheegay iyo waxa ay kala yihiin?

---

2. Sheeg tiradii, magacyadii iyo sidii ay u kala horreeyeen xaasaskii Nebigeenna Muxamed (SCW)?

---

3. Hoggaankii saddexaad ee Dawladda Islaamka Nebiga (CSW) dabadii waxa uu ahaa Cusmaan Binu Cafaan.

b) Sheeg sannadadii uu Islaamka u talinayey?

---

t) Sheeg shan arrimood oo uu Dawladda Islaamka ku soo kordhiyey?

---

j) Sheeg magacyada iyo tirada xaasaskii Cusmaan Binu Cafaan?

---

4. Immisa sannadood ayaa ay Ummaawiyiintu maamulayeen Dawladda Islaamka?

---

5. Nebigeenna suubban (NNKHA) waxa uu gaaladii la galay dagaallo badan.

b) Immisa ayaa Nebigu (NNKHA) hoggaaminayey?

---

t) Sheeg siday u kala horreeyeen iyo sida loogu kala guulaystay?

T) WEYDIIMO SOOYAAL AH (TAARIIKH):

1. Immisa madaxweyne ku xigeen ayaa Soomaaliland soo maray intii u dhexaysay 1991-2016?

---

2. Calanka Somaliland ee ka kooban saddexda midab iyo Tawxiidka.

b) Sheeg magaciisa oo saddexan farshaxankii loo xilsaaray sameyntiisa?

---

t) Sannadkee ayaa la sameeyay ayaase waddanka madaxweyne ka ahaa?

---

3. Sheeg shan astaamood oo ka mid ah astaamaha Qaran ama Waddan leeyahay ama looga baahan yahay?

---

4. Sheeg saddexdii waddan ee ugu horreeyay qaadashada gobonnimada ee ka tirsan Afrikada madow?

---

5. Sheeg madaxweynihii Soomaaliland ee ugu muddo xileedka dheeraa magaciisa oo saddexan iyo sannadihii uu maamulka hayey?

---

6. Guddidii qoraalka farta Soomaaliga ee la aas-aasay 1970-1971

b) Immisa xubnood ayaa ay tiradoodu ka koobnayd?

---

t) Sheeg magaciisa oo saddexan guddoomiyihii guddidaas?

---

j) Sheeg magaceeda oo saddexan gabadh guddidaas ku jirtay?

---

7. Sheeg tirada iyo magacyada xisbiyadii u horreeyay ee 1960 la sameeyay?

J) WEYDIIMO DHAQAN AH:

1. Sheeg toddobada ayaamood waxa afka Soomaaliga lagu yidhaa?

---

2. Sheeg hal xaraf oo aan afka Soomaaliga laga maansoon ama tix laga tirin?

---

3. Sheeg lix magac oo Soomaalidu la baxdo oo ay wadaagaan ragga iyo dumarku?

---

4. Sheeg lix magac oo loo yaqaan "Qorraxda"?

---

5. Sheeg afarta dumar ah ee nin wada qabo afka Soomaaliga waxa la kala yidhaa?

---

6. Sheeg odhaah ama weedh ay ku dhan yihiin xarfaha afka Soomaaligu?

---

7. Sheeg abwaankii tiriyey gabayga ay ku jireen labadan meeris ee hoose:

Raasada Berberi waa wadnaha reer waqooyiga'e
Mar haddaad Kismaayo u rarteen reerku kala guurye.

WARCELINTA CUTUBKA GOGOLDHIGGA (40%)

KU BUUXINTA ERAYADA SHAXDA KU JIRA

1- Gabayga
2- Shaqallada
3- Heellada
4- Haanta
5- Baarcadde
6- Maanso-gole
7- Maanso-guri
8- Maanso-geed
9- Jiiftada
10-Maydhaxda

ISKU BEEGIDDA LANBARKA IYO XARAFKA IS LEH

1= KH
2= R
3= SH
4= D
5= S
6= B
7= T
8= DH
9= C
10= J
11= X

KU BUUXINTA ERAYGA KA MAQAN

1. Suugaantu
2. Xundhur
3. Alannada
4. 1976
5. Heellada

6. Miisaanka Maansada
7. Xiddigta Oktoobar
8. Gabayga
9. Hoojiska iyo Hooriska
10. Xaraf-raacu
11. Suugaanta
12. Buraanburka
13. Tooxdheer iyo Tooxgaab
14. Xaraf-raacu
15. 1940-1945
16. Tix iyo Tiraab
17. Gabayga iyo geeraarka
18. Sitaadku
19. Saddex-dhaca iyo Afar-dhaca
20. Cod u gaara

WARCELINTA CUTUBKA SHEEKADA (Goobaabta 40%)

1- CAYNBA CAYN (Q. 1-AAD)

1. B
2. J
3. B
4. X
5. B
6. J
7. X
8. T
9. T
10. T
11. B
12. B
13. J
14. X
15. B

2- LUG LAGUUGU DAR

1. J
2. T
3. J
4. J
5. T
6. T
7. B
8. T
9. T
10. J
11. J
12. X
13. B
14. B
15. B

3- HAWL IYO HOGO KALIILEED

1. J
2. X
3. B
4. X
5. J
6. X
7. X
8. T
9. T
10. J
11. J
12. X
13. B
14. X
15. J
16. B
17. T
18. B
19. J
20. T

WARCELINTA CUTUBKA MAANSADA

(Warcelinta weydiimaha fidsan meerisyada la sharraxayo 40%).

Mar baan ahay nin xaaraan maqdaca, marin jidiinkiiye
Marna tuug mugdiya baan ahoo, maal Rasuul bixine
Mar baan ahay maqaam awliyada, muqadinkoodiiye
Marna mudanka shaydaanka iyo maal jin baan ahaye

B. Meerisyadani waxa ay ka warramayaan dareenkii laba wejiilenimo ee Abwaan

Qaasin gabaygiisa kaga hadlayey.

T. Waxa la adeegsaday "Sillan-sugan".

Lo'da dhogorta suusuubban lee, saciyo weysheeda
Adoogayba kama saadin jirin, subag guduudnayde
Iyaduna siyaaxee ninkii, soofsan jiray baa leh

B. Gabayaagani waxa uu lo'da ku ammaanay; Dhogorteeda wanaagsan iyo subagga cas.

B. Gabayaagii Maxamuud Cali ayaa xaaskiisa ku waaninayey.

T. Laba agab oo la goglado ayaa meerisyada ku xusan oo kala ah; Weylaalis iyo Waali.

B. Waxa uu ka warramayaa qiimaha Macallinka/Bareha.

T. Waxa uu ku sifeeyey lix astaamood; Ileys, afka lagu hadlo, Aammin, amal, ilo biyo leh iyo samafale.

B. Waxa ay wadaagaan; geela iyo riyaha waxa laga helaa cad iyo caano. Labadaba waa la bixiyaa marka la isku baahdo.

T. Waxa ay ku kala duwan yihiin; geela gabdhaha ayaa laga bixiyaa xilliga guurka. Riyaha sadaqada iyo muquunada ayuu lagu bixiyaa.

B. Liiruhu waa Lacagtii Talyaaniga oo Koonfurta Soomaalida gumaysan jiray.

B. Waxa uu S/Maxamed barbardhigayaa xaaska, faraskiisii Walhad.

B. Waxa ay ka hadlayaan meerisyadani araarta iyo ismuujinta abwaanka ee ujeeddadiisa ka horreeya.

T. Hasha caanaha badan, faraska dheereeya, hablaha quruxda badan iyo gu'ga hooray ee lagu reeyo.

B. Waxa uu dadka ku dhiirrigelinayaa shaqada iyo wax wada qabsiga.

T. In ay dahabka soo saaraan,
In ay beeraha midho ka soo saaraan,
In ay xoolaha dhaqdaan.

B. Beydadkan gabayga ahi waxa ay ammaanayaan riyaha.

T. Waxa baarqabka le'eg ee gabayaagu sheegayaa waa orgiga.

B. Waxa uu geeraarkan koobani ka hadlayaa dheelmintii Nebiga (NNKHA).

B. Dhabaqu waa malab yar oo macaan oo baal-dacarka dacartu bixiso.

T. Xidhiidhka ka dhexeeya dabagaallaha iyo likuhu waxa weeyi; dabagaallaha ayaa

jecel likaha.

B. Waxa ay ka hadlayaan meerisyadani jacaylkii Beledweyn ee Hadraawi ku caashaqay Beer-lula.

T. Buundada ciyaarta ee abwaanku sheegayaa waa Biriish Liicliic oo ku yaallay Beledweyn.

B. Masallooyinka tallantaaliga ah ee gabayaagu sheegayaa waxa weeyi, habdhaqankiisa iska soo horjeeda ee wanaagga iyo xumaantaba leh.

T. Muddeec waa qof aqbal leh,
Macangag waa qof garmaqaate ah.

B. Boqolka halaad waxa laga bixiyaa marka nin la dilo magtiisa.

T. Waxa lagu daraa dood iyo garnaqsi badan oo la is weydaarsado.

B. Seenyo-dhuux waxa uu uga jeedaa ri magaceed.

T. Waxa laga helaa harag caanaha lagu shubto iyo in magaalada loo iib geeyo marka la safrayo.

B. Waxa ku xusan tixda lix Abwaan

T. Cige Baraar waxa uu tixo badan ugu hanjabay kooxdii Kabacadda.

B. Afku waxa uu bulshada ugu jiraa kaalin weyn oo ah inay noqdaan Qaran jira.

T. Waxa lagu ilaaliyaa; Qaranka iyo Dhaqanka.

J. Waxa ka dhexeeya xidhiidh weyn oo ah in Qaranku noqdo mid jira oo Af gaara leh.

B. Waxa tiriyey X. Aadan (Afqallooc), waxa uu kaga hadlayey kaalinta Bareha/Macallinka.

B. Geesleyda uu gabayaagu sheegayaa waa lo'da.

T. Geela waxa uu gabayaagu siiyey kaalin sare oo ah inaan xoolo la barbardhigi karin.

WARCELINTA CUTUBKA MAAHMAAHDA (40%)

MAAHMAAHDA

1- Maahmaahda hore waxa ay sheegaysaa in aan arrinta dusha laga taataaban ee hoos loogu daadego. Ta danbena waxa ay tilmaamaysaa in aan danta la dhaafi karin, sida aan madaxaba looga boodi karin.

2- Saddex waa ay naaran yihiin.

3- Saddex baa naaran oo saddexbaa ka naar qaata.
4- Maleynta saddexda ku naalooda;
B) dheriga ka cunaya ayaa ku naalooda.
T) Awrta reerka ku guuraya ayaa ku naalooda.
J) Guurtida garlaha xaqa ku taagan ayaa ku naalooda.
5- Falanqeynta ujeeddooyinka ay xambaarsan yihiin.
B) Saddexda mugdiga ah waxa mideeyey ama ay ku mideysan yihiin; cabsida iyo werwerka.
T) Ujeeddada guud ee maahmaahdan sagaalleyda ahi waxa weeyi; siba si ayaa ay dhaantaa ama ka wanaagsan tahay.
J) Dayaxa, Ergada iyo Cawska; saddexduba waanwaan rejo ayaa ay leeyihiin. Waxase ay ku kala duwan yihiin xaaladda ay kala tilmaamayaan.
6- B) Ujeeddada iyo dulucda guud ee maahmaahdani waxa weeyi, qiimaha tawfiiqda iyo wadajirku leeyahay iyo qiimo darrada tafaraaruqa.
T) Waxa loo adeegsadaa marka la isku boorinayo wadajirka ee la iska ga digayo kala tagga.

7- Dumaali waa dabar carruureed
Maahmaahdan waxa looga jeedaa; carruurta aabbahood dhintay waxa u wanaagsan in hooyadood uu dumaalo adeerkood, si ay carruurtu xidhiidh xigtonimo u yeeshaan dhinac walba.

WARCELINTA CUTUBKA HEES-HAWLEEDDA (Waxa loogu heeso iyo goorta loogu heeso 40%)

1. Lo'da, dheelminta (carraabinta)
2. Lo'da, daajinta
3. Geela, waraabinta
4. Geela, daajinta
5. Riyaha, waraabinta
6. Beerta, qodaalka
7. Geela, daajinta
8. Cawska, Sameynta
9. Geela, waraabinta
10. Geela, carraabinta
11. Geela, dareerinta
12. Lo'da, waraabinta
13. Geela, waraabinta
14. Dibida, qodaalka
15. Fardaha, dagaalka
16. Mooyaha, tumidda
17. Haanta caanaha, lulidda
18. Dibida, qodaalka
19. Kebadda, sameynta
20. Dibida, qodaalka
21. Nirgaha, daajinta
22. Lo'da, waraabinta
23. Geela, waraabinta
24. Dameeraha, raridda
25. Carruurta, koolkoolinta
26. Awrta, raridda
27. Lo'da waraabinta
28. Dibida, qodaalka
29. Nirgaha, carraabinta
30. Idaha, daajinta
31. Awrta, raridda
32. Lo'da, dheelminta
33. Riyaha, daajinta
34. Geela, waraabinta
35. Kebadda, sameynta
36. Kalluunka, Jillaabashada
37. Beeyada, gurashada
38. Idaha, hadhgelinta
39. Haanta, lulidda
40. Geela, carraabinta

WARCELINTA CUTUBKA DHISME-AFEED (NAXWE) (Qaybta goobaabta)


1. B
2. T
3. J
4. B
5. T
6. T
7. J
8. B
9. T
10. J
11. B
12. T
13. J
14. X
15. B
16. T
17. J
18. T
19. J
20. J

WARCELINTA CUTUBKA HUMMAAGYADA QAYBTA (T)

1. Ekeeye
2. Buunbuunin
3. Ekeeye
4. Sarbeeb
5. Buunbuunin
6. Sillansugan
7. Sillansugan
8. Duurxul
9. Buunbuunin
10. Shareere
11. Ekeeye
12. Duurxul
13. Xus
14. Sarbeeb
15. Xus
16. Buunbuunin

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

WASAARADA WAXBARASHADA IYO SAYNISKA



9 781953 724908

HEMA BOOKS